QISO JACAYL AH.

ILLIN JACAYL

W.Q. Cabdulqaadir Maxamed Wacays (Cali_Baashe)

....Haddii qiyaamaha
la iska arko
iyadaa innoo ballan ah..

ILLIN JACAYL.

Dhis niyadda iyo qalbiga, adkee wanaagga iyo barashada. Ha fududeysan kalgacalka iyo jacaylka, haka baqin nasiibka iyo waayaha, hana illaawin aayaha iyo mustaqbalka. Ubuxu waa laga yaabaa inuu dharo, xadiidkuna waa laga yaabaa inuu daxalaysto, dad ehel ahi waa laga yaabaa in ay is illaawaan, mu caashaqiin tuse...

Aragtidaadaan u hiloobay, dharaartii ma harsado, habeenkii ma ledo, guntadii waa la igu diray, wax cabisna haba sheegin. Wax ma maqlo, waxna ma arko, intaasna adiga uun baan kugu soo maqanahay. Hadalkaaga ii soo duub si aan nafta ugu sasabo, sawirkaaga ii soo dir si aan indhaha ugu samirsiiyo, qalbiga sahay ugaga dhigo.

Waxaan isku ognahay fiiro gaar ah, xusuus gooni ah, kalgacal dheeraad ah, xiiso fidsan iyo kalsooni dhab ah. Xusuustu waa qaali ee ogow, niyaddu waa rasmi ee la soco, kalgacalku waa joogto ee u fiirso, jacaylku waa sad ee ha fududeysan, waafajintuna waa ta Ilaah ee ha moogaan.



/Qeybtii Koowaad/

Inkastoo wedku ina kala kaxaynayo, dib dambana aynaan dunida ugu wada kulmeyn, misana ogow inaan weli ku jeclahay, ogow inuu jaceylkaagu ka buuxo dhibic kast oo dhiigeyga ka mid ah.... Haddii Qiyaamaha la isku ark iyadaa inoo ballan ah.

Markii Telefoonka loogu sheegay shilkii naxdinta lahaa ee ay mataantiisii caashaqeu gashay intay dhulka iyo cirku la wareegeen, isna hayn kari waayay bay tin iyo cirib naxdini ku joogsatay.

Gacantii uu Telefoonka ku hayay baa gariirtay markaasuu isaga oo aan warkiiba loo dhamayn intuu jaha Wareeray, cagahana ku taag aan kari waayay, buu Telefoonkii gacantiisa ka faniinay, isagiina sal jugle u dhacay, dhidid fara badan baa mar qura jirkiisa kasoo yaacay, meel uu dunida ka joogo buu waayay... ma Xamar baa... Ma bari baa... Ma bakhaatkii aabbihii baa... mise gurigoodii weeye, intay daartii uu ku jiray la sabaysay bay mar qur ah la qalibantay, sidii tiiyoo ay tahay dooni yar oo dabeylo duufaan wataa soo weerareen, alaabtii xafiiskana la wareegtay. Calafku dhib badanaa, wedkuna ka daranaa.

Xalay bay isa soo mehersadeen, berri dambana arooskoodii buu ahaa, nasiib darrose Canab tii ay isla aqal geli lahaayeenba maantuu gaari weyni ku joogsaday,

ah iyo way, laba guur ku ballansanaa muxuu wedku kala waday, laba aan la isku qorinna muxuu calafku kala qaadiyey.

Waxaa Mahad warkaas naxdinta leh Telefoonka ugu sheegay wiil cusbitaalka Digfeer kaaliye ka ahaa oo labadooda isku yaqaanay.

Isaga oo sidii hore dhaama, intuu bakhaarkii albaabada usoo xiray, gaarigiisiina isku soo tuuray buu cusbitaalkii dalaq soo yiri, wuxuu isla markiiba indhaha ku dhuftay Canab oo jirkeedii oo dhan faashado iyo faleebooyin ku xiran yihiin, wejiga uunbaan u furnaa, intuu u dhawaaday naxdina la ilmeeyay buu isaga oo dul taagan ku yiri "Gacalo sidee bay wax kuu gaareen".

Canab Wejigeeda deganaan baa ka muuqatay, markii codkiisu dhegaheeda gaaray buu feelkeedu sida gaaraabidhaanka u iftiimay:- "Gacaliye in mininkii runta ahaa la ii kaxaynayo baan filayaa, ee bal iisoo dhowow aan hadal yar ku iraahdee". bay ku tiri iyada oo kolba codkeedu sii taagdaraanayo.

Intuu Mahad naxdin la gariiray bartii uu taagnaana ku jilba joogsaday buu hadalkeedii dhegta u dhigay, waxay tiri:- "Dhimashadeyda dantaada ha u baabi'in geeridu xaq weeye, e inta aad nooshahay amir iyo dul qaad lahow, naftana toobiyaha toosan

tus, naftu yay ku hoggaamin ee caqligu haku hoggaamiyo Hablaha faraha badan wadistoodu ma fiicnee, gabar wanagsan ka guurso"....

Intaas markii ay tiri bay aamus dheer gashay, waxayna naftu ka baxday iyada oo leh (In kasta oo wadkuina kala kaxaynayo, dib dambana aanan dunida ugu wada kulmi doonin, misana ogow inaan wli ku jeclahay, ogow inuu jaceylkaagu ka buuxo dhibic kasta oo dhiigeyga ka mid ah... Haddii qiyaamaha la isku arko iyadaa inoo ballan ah.....)

Markii ay shib tiri, inta uu Mahad naxay buu foolka gacanta ka saaray, indhaheedana kala furay mise naftiiba way ka baxday.

Wuu isku yaacay.... Ma'isagaaba weligii arkay qof naftu ka baxayso, Telefoon buu di ay, waalidiintii labadooda dhashay ayaana meeshii isugu yimid Mahadna si dhaqsiyo leh ayaa guriga loogu qaaday,.

Isla galabnimadiiba Canab waa laboo duugay, aaskeediina si mug leh baa looga soo qayb galay. Qofkii dhimata iyada uunbaa iska dhimatay, dhowr maalmood gudahood baa Canab lagu hilmaamay, Waxayse qalbigiisa ka tirmi wayday Mahadkii ay ifka ugu jecleyd, kolkuu waad hilmaantay is yaraahdaba waxaa hortiisa kusoo sawirmaya hadba iyada oo luxudka gunta loo dhigayo, Waxaa hortiisak ka muuqanaya dhibaatadii iyo rafaadki

ay isla soo mareen, hadaladii jaceylka ku dheehnaa ee ay ku oran jirtay iyo kuwii ay dhimashedeedii tiri baa mar qur ah xusuustiisa soo wada gelaya, markaasuu iska ilmaynayaa.

Raashinkii ay naftiisu u baahneyd buu saani u qaadan karri waayay markii af muggii qaado is yiraahdaba waxaa weelka uu wax ku cunayo uga dhex muuqanaya karfantii caddeyd ee lagu duuduubay mataantiisii caashaqa, waxaa hortiisa imaanayay naxashkii meydkeeda lagu qaaday, waxaa u muuqanayay hadba iyadoo inta luxudka la jiifiyo ay dhowr qofood camuud aan yareyn dusha uga gurayaan.

Maalinta iyo habeenkuba mid bay u ahaayeen umana kala rooneynn malaha way isku gaashaanbuureysteen. Kokkuu tallaabo yar qaad is yiraahdaba wuxuu ku dhex hafanayaa badweyn murugo ah, hurdadiibaa looga dhaartay maalintiina ma harsado, habeenkiina ma jiifsado, habeenada qaarkood siduu ugu dhex dabaalanayo hirar dhaadheer oo murugo ah ayuu malaha intuu ku fogaado maskaxdiisuna xanili kari waydo buu af muggii qaylo dhawaaqaa.

Waxaa Mahad samirsiintiisa u heellanaa asaxaabtiisoo wiilal iyo gabdhoba lahaan kuwaasoo isku howlayay sidii ay fakarka iyo kelinimada uga ilaalin lahaayeen, una madadaalin lahaayeen si uusan wax usoo gocan,.

(Weey Mahadyare)bay ku salaantay Shukri oo asaxaabtiisa ka mid ahayd, galabtaasna aqalka kusoo booqatay, waxay Shukri rumeysneyd maaddaama ay Canab muddo laba bilood ah mootan tahay inuu Mahad caadigiisii kusoo noqday, waxayna u sheegtay casumaad qado ah oo iyada iyo ninkeedu ay maalinta jimcaha ah asaxaabtooda ugu talo galeen,.

Sidii ay ballantu ahaydba wuxuu Mahad maalintaa Jimcaha aaday guriga dumaashidiis Shukri halkaasoo casuumadda lagu qabanayay, Waxaa gurigakaga soo horeeyay Samatar oo hadal badni ku faquuqnaa, wuxuuna Mahad ku salaamay " Waa maxay Mahadow Waqtiga aad inoo socoto, mise xaaskii baad intaas oo dhan kasoo dhaadhicinaysay".

Hadal kaftaneedkaas oo Samatar is lahaa jawiga ku qurxi, doodana ku macaanee, wuxuu Mahad ku noqday gantaal beerka ka cuskaday, erayga " Xubnaha jirkiisa oo dhan baa mar qura wada gilgishay, sidii tiiyoodareen wadayaashiisii heegan laga dhigay, Mahad oo awood ballaaran u lahaa qarinta xasaradaha xubnaha jirkiisa ka dhex oogma iyo caburinta xasuusaha murugada leh ee uu waayahanba martida usoo ahaa, intuu qosol aan laabta jirin iska dirqiyay buu ku war celiyay "Haddii ay jiraan rag aysan xaasaskoodu sidaa u xakameyn, anigu waan ka duwanahay, waayo xaaskeygu si ba'an bay ii jeceshahay, sidaa darteed si fudud fasax loogu heli maayo".

Markii ay casuumaddii qadada ahayd si fiican ku

soo gabagabowday, qorraxduna galbeed kusii siqayso, daruuro qurux badan oo raxmadda eebbe ka tarjamayana cirka ku gedfan yihiin, jawiguna yahay mid farxadeed bey gabdhuhu qolka fadhiga ku diyaariyeen shaah casaryo ah iyo cunta kaloo fud-fudud, kuwaasoo loogu tala galay in lagu sheekeysto, casuumaddana lagu soo gunaanado.

"Zamzamay waad ogeyd inaan aad kuu jeclaa oo weliba aan jid kasta kuu soo maray, waanad la socotaa jaceylkeygii dheg aad jalaq usiiso iska daayee, Magar-daamooyinkaan ogaa baad ii maleegtay, haddaba taasi ma d-owbaa walaaley?" Sidaa Ismaaciil baa Zamzam kula kaftamay, iyadoo qof waliba uu afka ubuuxo koob shaah ahna gacanta ku haysto,.

Ismaaciil oo ahaa wiil ay foorjadiisa dhallintu ka meermeerto, markuu intaa yiri, inta ay dhallintii oo dhammi wax cunis iyo cabistiiba joojiyeen bey Ismaaciil iyo dhenkeedii usoo jeesteenn iyaga oo naawilaya bal galabta cidda kala furfuri doonta Zamzam iyo Ismaaciil oo labada aftahanimmo lagu tuhmayay .

"Haddii goor hore aanu is gahmi lahayn maanta sida Shukri iyo Samatar baannu u raaxeysan lahayn, oo guur raandhiis leh baannu geli lahaynn casuumaddan oo kalena waanu dhigan lahayn". "Waxaasoo dhanse adigaa dii daye", buu u raaciyey":

"Aniga nin kale mooyee adiguse iima gabban ka tid", bay Zamzam isku difaacday iyadoo hadba

dhinac u ruuqaansanaysa sidii iyadoo isku haaraameysa (War balaayo qabahan maxaa maanta ku tusay).

"Oo maxaa dhuumaaleysiga keenay, ma annagaa ugaarsato ah." buu Ismaaciil ku weerar galay isagoo doonaya inuu doodda sii furfuro.

"Oo maxaanu ugaarsatada kaga duwanahay mar haddii aynu is shirqooleyno", Zamzam markay intaa tiri waxaa mar qura horteeda timi qisadii dhalanteedka ahayd ee ay iyada iyo Ismaaciil isla soo mareen.

Waxay soo xusuusatay khiyaamadii uu Ismaaciil kula kacay, waxay is tustay sida uu Ismaaciil u doonayo inuu garta uga fara maroojisto, isaga oo hab kaftaneed kula garramaya,kana faa'iideysanaya madasha meesha ku kulansan, si uu markaa dib ugu soo dhiso sumcaddiisii goor hore baaba'day.

"Zamzamay weli ma aadan kala garan qofka shirqoolka loo maleego iyo qofka kalem ma qof wadnihiisa dhaawacayaa jira", buu Ismaaciil yiri, kaddib markii uu garaaxx in ay Zamzam la fahamtay halka uu faraska ku wado. Wuxuu misana u raaciyay, "In aad khalad iga fahamtay baan filayaa".

"Khaladna kaama fahmine, waxaan indhahayga ku arkaynn xaqiiqooyin dhab ah oo muujinaya inuusan jaceylkaagu dhab ahaynn balse ahaa dhalanteed bushimaha uun ku ekaa"..

Waxaa la yiri:- hadal nin si u yiri ninna si u qaaday, haddaba xaajiyo xaalku sida aad mooday ma ahan,

goor horaanse arkay in la iga kaa war sheekooday, Jaallow waxba haka warwareegin ujeeddadii ka dambaysay jaceylkaagii dhalanteedka ahaa, waxaad tahay nin xiisaalow ah oo raba inuusan caawa ku seexan sariirtii uu xalay ku galgashay, waxaa doonaysay in aad waqtiga uun isku kay dhaafiso ee dan kale oo sidaa usii ridan igama aadan lahayn.

Talaa Ismaaciil ku caddaatay, wuxuu dareemay in gefkiisu goor dhow soo ifbixi doono, maxaad isaga aamusnaan wayday buu niyadda iska yiri, Ismaaciil inuu Zamzam jaceyl kaga baxay oo keliya uunbaa hore loo ogaa markanse qisadii oo dhan ayaa dibadda timi. Weerar badanaa, intuu si qaab leh isku qaabeeyay sidii uu wax yaabo kale gocanayo buu wuxuu yiri:- "Oo kaalay adigu ma uur ku baalaad tahay yaa uurkeyga kaaga xog warramay", wuxuu misana usii raaciyay isaga oo isleh su'aashan bay ku xirmi doontaa "Oo miyaanan anigu ahayn nin rag ah oo ay gabadh kasta u bannaan tahay?."

Waa dhab oo gabar kastaa kuu bannaanm laakiin maxaad aniga ragga oo dhan iiga xannibaysaa, mar haddii aad adiguba dumarka oo dhan isu fasaxday, mise weli baadan maqal mahmaahda Soomaaliyeed oo tiraahda "Gabar kun baa kooda (shukaansata) kow beyna kala baxdaa".

Daahir oo Ismaaciil gacan siinaya, Zamzamna gacan bidixaynaya, baa intuu Ismaaciil dhankiisa qooraansaday yiri "War tanu rajo malaha, wax

kalana ma ahee gabdho aan iyada ka fogeyn baa kugu diray".

Xaawo-luul oo durbadiiba dareentay hadalkaas uu Daahir yiri inuu iyada si toos ah u duqaynayo ayaa intey koobkii shaaha ahaa miiska dul dhigtay, durbadiiba lasoo boodday "Oo baakiin adiga maxaa kusoo dhexgeliyay, kii wax tabanayay ma tihid kii laga tabanayayse ma tihide". Yuusuf oo ay hadda ka hor Xaawo-luul is qoomeen baa isaga oo fursadan ka faaiideysanaya wuxuu lasoo booday "Waxaa la yiri meel bugta iyo fartaa is og, haddaba haddii aysan Xaawo-luul dambiile ahayn maxaa gabdhahaa oo dhan kasoo dhex saaray". Maryan-kiinoo dareentay cambaareyntaas uu Yuusuf Xaawa-luul qoorta u suray inuu kaga aargudanayo xumaatooyin ay hadda ka hor u geysatay oo calooshiisa ka guuxayay kaddib markii uu damcay inuu jilo runna moodsiiyo jaceylk dhalanteed ah, baa intay hadalkiba daftay waxay tiri:- "Wixii horeba quba markaan waxaa la isku haystaa farina ku godan tahay sababta Yusuf kasoo hadlisay, Xaawo-luulna uu dambiilaha ugu sheegay".

Mahad oo isagu gooni ula sheekeysanayay Saaxiibkiis Samatar, mararka qaarkoodna doodda dhagaysanayay, qatyaanse ka taagnaa dhagaysigooda baa isaga oo isleh aad halkaas kusoo gabagabaysid wuxuu yiri: "War buuqan iyo sawaxankani waa buu inagu dheeradaye maanu halkaas ku dhaafno".

Wallaahi inaynaan dhaafeyn, jaallow adigu iska aamus

haddii ay dumaashiyaal fiican kuu yihiin, innagu dab iyo dhagax baanu isku nahay", bey wiilashii Mahad ku hiifeenn iyaga oo raba inay dooddu halkeeda kasii socotoo qof walibana isaga oo dood kaftaneedkan ka faa'iideysanaya uusoo bandhigo dakanadii hore hore looga galay, haddiiba ay joogto ciddii mas'-uulka ka ahayd.

Weertii ahayd haddii ay adiga dumaashiyaal fiican kuu yihiin waxay Mahad ku noqotay gantaal beerka ka cuskatay, dhulka iyo cirkaa la wareegay, inuu jiifo iyo inuu fadhiyo buu kala saari waayay, meesha uujoogo iyo xaaladda uu ku sugan yahay buu halmaamay dhallinyaradii uu dhax fadhiyay baa dhagxan madmadow la noqotay, nabarkii uu bogsiinayay baa si xun uga damqaday, damqashadiibaa ku badatay, markaas uu inuu ku dhufto ku sigtay, ayaamihii hore xaweddna buu u lahaa inuu xusuustiisa murugo qariyo, maantase talo farahay ka baxday, kontaroolkii baana ka lumay, waxaa uu suuraystay Canabtii oo dhiiggeedu laamiga ku rafanayo, waxaa hortiiska timid markii ay naftu kasii baxaysay iyada oo leh:-

(Mahadow in kastoo wedku ina kala kaxaynayo dib dambana aynaan dunida ugu wada kulmi doonin - misana ogow in aan weli ku jeclahay, ogow inuu jaceylkaagu ka buuxo dhibic kasta oo dhiigeyga ka mid ah, haddii qiyaamaha la isku arko iyadaa inoo ballanah),

Indhahiisa ilmo fara badan baa ka daaysay waxayna daawanayeen dhaaim maskaxdiisa kadhex shidnaa oo ku saabsanaa dhacdooyinkii farxadda iyo murugada lahaa ee ay isla soo mareen isaga iyo Canabtii uu dhawaantan wedku kala waday, waakan filimkii dheeraa ee uu maskaxdiisa ka daawanayay:-

Hooyo waa ku sidee, miyaadan saaka Iskoolka aadeynin, bey kutiraabtay, islaan cod weyn oo Mahad Hooyadiis ah, intay usoo dhowaatay gacantana foolka ka saartay iyada oo isleh armuu xanuunsan yahay bey misna usii raacisay: " Waar ka toos meesha waa maxay waqtiga aad hurudo".,

Waqtigaas ay Hooyadiis toosinayso waxay ahayd goor Waaberi ku dhowaad ah, qorraxduna isu diyaarinaysay inay dibadda usoo ridato carrab dheer oo malaha usii xaara surinkii ay sii mari lahayd, sidii ay caadadisu ahayd inta uu lasoo baxay caday dheer oo sariirta laabkeeda ugu jiray buu dibadda usoo dhaqaaqay markii uu albaabka soo dhaafay waxay indhihiisu qabteen gabar dhabarka ku xambaarsan dambiil weyn oo tanag dhuuban oo yaanyo ahi ku dhex jiro, waxay u muuqatay gabar yaanyooley ah, falaar dheer oo danab ah oo ka timid xaggeeda baa Mahad wadnihiisa duqeysay, wadnihii baa walbaday, markaasuu dhidid fara badani kasoo yaacay, leeb baa qalbiga ka cuskaday, laakiin ma garaneyn cidda kusoo tuurtay iyo meesha laga soo ganayba. Muuqaalkeedii baa qeybta xumuus reebka ee maskaxdiisa si fiican ugu sawirannay, talow tani ma jiniyadbaa,

waa tanoo adigii oo dhan bey ku qallibtayoo buu niyadda iska yiri, Mahad wuxuu dareemay isbedelka ku dhacay in aysan arkista gabadhan ugu horreyn, laakiin sababta ka dambaysa buu la fajacay.

Hooyo saaka aad baan u daahay, quraacna ka;a gaaro, laakiin maqaayadda dugsiga baan ka quraacanayaa, intuu Hooyadii ku yiri isaga oo dareyska dugsiga isku boobaya, buu isaga oo albaabka guriga kasii báxaya yiri jaaw Hooyo,

Dharaartaas intii uu dugsiga joogay oo dhan waxaa ku hagoogneyd shuko dhalanteed ah oo cidda u xirtay uusan garaneyn, culeys buu dareemay, meel uu ka saaran yahayse ma garaneyn, awoodda xasuustiisa oo dhan baa lala wareegay, sababta loola wareegayse muu ogeyn, waxaa hadba hortiisa inaanayay gabadhii Yaanyada dambiisha ah dhabarka ku wadatay, wuxuu dareemay inay jirto awood tiisha ka weyn oo maskaxdiisa ku qasbaysa soo xasuusashada gabadhaas iyada ah, wuxuuse garan waayay halka ay awooddaas ku abtirsato iyo cidda ka mas'uulka ahba.

Subaxdaas ardayda fasalkiisa, gaar ahaan Inta ay sheekadi ka dhaxaysay, way fahmeen inay Mahad wax uun si ka yihiin, qaar baana waydiiyay "Mahadow maxaa ku helay maanta si baad u madl-uunsantahaye"?. wuxuuse isaga oo is qarsanaya ugu cudurdaartay "Wallaahi maanta sheekadii uunbaa isugu keen bixi wayday mooyee wax kale

ma jiraan", Markuu Mahad fekerkii iyo is caburintii ku talax tegay bay xumad darani ku habsatay.

Mahad, xabiibi, aboowe maxaa ku helay, bey Mulki oo ay isku fasal ahaayeen ku tiri, iyada oo foolkiisa gacanteeda ku cadaadinaysa, Mulki iyo Mahad ilmo-adeer dhab ah oo misana isku doonan bey ahaayeenn jaceyl kana uusan dhaxayn inkasta oo Mulki ay jaceyl sheeganaysay, haddana iska helista aabba-yaashood uun bey isa siintoodu ku timid.

"Wallaahi wax i daaray garan maayo, markaan Dugsiga saakayto soo galay uunbaa is arkay aniga oo xummad daran dhex dabaalanaya", buu cod tamar dari ka muu-qato ku yiri.

Wuxuu Mahad guriga soo gaaray isaga oo ay xumaddu si ba'an u karkarinayso, dhidid fara badanina uu jir-kiisa wada qooyay, haddii dusha sare laga arko waxaa la moodi lahaa qof mar dhow soo mayrtay, haddiise loo soo dhowaado oo meel ka mid ah jirkiisa sacabada la saaro waxaa la moodaa qof goor dhow biyo karaya kusoo dabaashay.

Inta uu qolkiisi dalaq yiri isaga oo aan hareerih-iisa eegin, welina dareyskii dugsiga qaba, buu sar-iirta isku tuuray, waxayna maskaxdiisu ku howlaheyd gabadhii dambiisha Yaanyada ah xambaarsaneyd.

Inkasta oo uu dusha sare qof hurdaya uga ekaa haddana dood qaraar bey xubnaha jirkiisu madaxa iskula jireen, iyada oo isla gorfeynaya xusuustan yaabka leh ee kolba kusoo noqnoqoneysa ee la xiriirta

gabdhii yaanyooleyda aheyd, maskaxdiisu wey ku qasbaneyd soo xusuusashada gabadhaas iyadaah, wey u muuqatay in ay balaayadu gabadhaas kasoo gaartay, sababta ka dambaysay baase hal xiraaleku noqotay.

Galabnimadii goor ay casir liiq tahay bey Mulki irid bannaanka kasoo gashay qolkii uu Mahad deganaa, Markii ay indhaha ka qaaday Mahad oo sariirta ku xooran welina dareyskii dugsiga qaba, bey ilmo indhaheeda kusoo joogsadeen, xanuun dartiis inuu xitaa dharkiiba iska saari waayay bey is moodsiisay intey usoo dhowaatay bey iyada oo dhabanka kadhunkaneysa waxay niyadda iska tiri "Allahayow caafimaad ugu roonow, caafimaadkiisu waa caafimaadkeygee".

Isaga oo Mahad is dhinac rogaya wejigiisana deganaani ka muuqato, sidii tiiyoo ay niyaddiisu xan dhagaysatay hadaladii ay Mulki niyadda iska lahayd, buu kusoo baraarugay, Mulkidiiyoo hareertiisa dhakoosha, wejigeeduna tiiraanyo la duuduuban yahay, intuu si quman sariirta isugu qaabeeyay buu kala hormaray "Wey Mulki ii warran". " Waa nabade, adigu xanuunkii saaka see ka tahay?, halkeese kuugu darreyd?.," bey cod naxariis leh ku tiri;

Waan iska fiicnahay, intuu ku yiri buu aamusnaan dheer galay, ma isaga meesha laga hayo garanayaba, xumad uun baa jirkiisa ku habsataye..... Ma xubin gaar looga habtay baa jirta, ma war bey noqonaysaa maskaxdeydaa isku buuqday, markaasey xumadi i qabatay, sow markaas maxaa maskaxdaada buuqa

geliyay lagu oran maayo, ma wixuu oran karaa gabar Yaanyo xambaarsan oo aan saakayto keliya arkay uun baa mar kasta i hortaagan oo i hor imaanaysa, oo haddiiba uu sidaa yiraahdo sow su'aalo fara badani ka daba iman mayaan..... Sow markaas shaki weyn Mulki uurka ku qaadi mayso..... Muuba iska aamuso muxuu dhibaato kadheer isugu soo jiidayaa.

"Laba maalmood baan dugsiga ka maqnaanayaa ee xanuunkeyga macallinka la socodsii duruusta i dhaafaysana ii soo guuri", buu ku yiri.

Waajibku mahad naq malaha intay tiri bey albaabka kadinkiisa u dhaqaaqday iyadoo leh "berri galab baan kuu imaanayaa".

Xaggee baad ku ordeysaa? intuu kadaba tuuray bey iyaduna kusoo celisay gabadhii Caasha ahayd ee isku uulka nala dhiganaysay baa Telefoonka la iigu sheegay inay xanuunsan tahay, markaa iyadaan soo booqanayaa.

Waxay gabadha Yaanyooleyda ahi subax kasta soo hormartaa Mahad oo gurigiisa ku hor cadayanaya, waxay kaloo indhihiisa habtaan marka uu dugsiga gelistiisa dhowrayo, iyada oo suuqa Xamar weyne ka timid oo u dambiil Yaanyo ah xambaarsan, labadaas waqti aad bey Mahad ugu dheeraayeen, waxay arkisteedu u ahayd shidaal ay naftiisu ku howlgasho, dharaartuusan arkin dharaar mugdi ah bey u ahayd, subax kasta markay guriga kusoo hor marto iyo marka uu dugsiga ku hor arko intaba farxad iyo deganaan uusan hore u qabin buu dareemayay, laakiin ma garaneyn sababta

ku dirqiyaysa ku farxista aragtida gabadhaas, sow lagama yaabo inuu dooqiisu ka helay jeceylna laabta ugu qaaday... .....

QEYBTII LABAAD.

Alla... taasi dhimatay, bay mar qura wada yiraahdeen ardaydii faraha badneyd ee meesha tubneyd iyaga oo usii raacaya dhankii gaarigii TOYOTA-da ahaa, waxay goobtu ahayd barxadda kasoo horjeedda Dugsiga Sare ee Hawl-wadaag, ardayduna dugsiga irriddiisa bey hor tubnaayeen iyaga oo dhowraya gelista Dugsiga dadkii meelaha ka dhowaa iyo kuwii kale ee socotada ahaa baa iyaguna mar kusoo wada yaacay goobtii shilku kadhacay.

Wallaahi taasi jugta gaartay sida ay uga soo kabataa wey adagtahay, iyo wallaahi lafaheeda midi ka badbaadi maysan bey isla dhex marayeen, qofku qof dumar ah buu ahaa, haweeney gabogabo ah uma ekeyne gabar yar oo bisil muuqaalkeedey laheyd, lama aqoonsan karin wejigeeduna carradwu kusii jeeday, diric calal ah oo dhowr iyo toban meelood ka daloola iyo garbasaar kusheeg baati ah oo maro hore u dhamaatay laga soo gooyay bey dhar ahaan u qabatay, dhaqdhaqaaq ma lahayn inkastoo dhaawac muuqdaa uusan gaarin, jiarkeeda sarena uu bed qabay baddana jugta gaartay miyir beelkana ku riday bey dadku dhabanadala haayeen, dambiil weyn oo maran baa dhinaceeda ku xoorreyd, hareeraheeda waxaa ku daadsanaa yaanyo fara badan oo kasoo fatahantay

dambiishaas... Dhowr daqiiqadood gudahood ayey goobtii waxay u ekaatay goob ay laba naadi oo kulkulili ku hardamayaan ciyaartii ugu dambaysay ee tartankooda lagu soo gunaanadi lahaa.

Meesheedey ku xoorreyd, wax dhaqdhaqaaq ahna laguma arag, dadka qaarkood waxay sii saadaalinayeen inayba naftu ka baxday oo aysan mindhaa nafba la dhul dhicin.

Goobtii loo wada carar, Mahadna dhankiisa ka carar, Alla waa gabadhii yaanyooleyda ahayd ee subax kasta Dugsiga soo hor mari jirtay, bey ku qeylisay gabar ka mid ahayd ardaydii meesha isugu soo ururtay. Wuxuu Mahad hadalkaasi ku noqday dhimbil dab'ah oo dhabarka ka cuskatay, waxaa durbadiiba hor timid gabadhii ayaamahan dhiiggiisa ku dheehneyd ee calwinaysay habsami u socoshada howlaha uu qabto habdhiska fekerkiisan, wuxuu soo xusuustay gabadhii dambiisha yaanyada ah xambaarsaneyd ee ay naftiisu ku ildoogsan jirtay. mar quray jiriirico wada saaqday dhammaan jirkiisa, sid arday dalka dibaddiisa waxbarasho ugu maqnaa oo Telefoon loogu sheegay inuu aabbihii geeriyooday, intuu dareenkiisii xakameyn kari waayay buu is arkay isaga oo iska ilmaynaya.... Oo maxaa ku dhacay.. Oo nabarka ka damqaday muxuu ahaa.... muu garaneyn... wuxuu dareemay in dhambaallo murugeedoo deg deg ahi ay dareenwadayaasha jirkiisa si dhiifoon maskaxdiisa ugu tabinayaan, mause garaneyn cidda amarka ku siisay dareenwadayaasha jirkiisa inay qabtaan howshaas iyada ah.

Aragyey cabsida iyo tiiraanyada jirkiisa kusii fidayay, yaase u shegga sababta ka dambeysa, nabar baa ka damqaday oo xanuunkiisa ayaaba kaar ku hayay, haddii la waydiin lahaa waxaa ka dhaxeeya isaga iyo gabadha meesha xooran oo uu u tiiraanyoonayo waxay malaha su'aashaasi ula muuqan lahayd sidii isagoo daqiiqado gudahood lagu amray inuu dhulka kula simo buurta weyn ee Himilaaya....

Waar innaga beyra, intuu cod tiiraanyo leh ku yiri buu dadkii soo dhex jiiray, sidii nin waalan ama waddada loogu soo sheegay inuu saaxiibkiis meel hebla gaar ku kala gooyay, markuu sidaa leeyahay ogaalkiisu wuu calwisanaa, dadkii meesha ku xoonsanaa intey mar qura Mahad soo wada deymoodeen bey gooni isugu beyreen. Mahad si quman u fiiriyey, garayayna gabadha meesha ku xooran, waa iyadii... waa iyadii, muusiq tiiranyo leh baa ku yeeray, intuu indhaha marmartay sidii tiiyoo ay been u sheegaan buu dhowr jeer daymo waalli ah ku celceliyay, intuu halmaamay dadkii iyo ardaydii foraha badneyd ee ag taagnaa, kuna foorarsaday, hadbana labada dhinac u rogey, buugaagtii uu watayna iska firdhiyay buu boohin la dhinac fariistay.

Maad gabadha Taxi soo saartaan, maxaad meesha ugu haysaan oday meesha joogay oo Mahad ku dhega hadlayay baa sidaa ku tiraabay, Mahad oo awal dhegihiisu wax maqalka gabeen baa intuu hadalkaas kusoo baraarugay gabadhii oo dhaba laabta kusoo xambaartay sidii wiil dhallinyaro al oo koolkoolin ladamacsan inan yar oo dhowaan

loogu curtay, ma mooddaa sidii mucaashaq mataantiisiy dhibaataysan laabta ku ururssaday, mase u egyahay nin uu caynaanka u hayo jaceyl diirran oo hadba u horseedaya halkii uu muraadkiisu ku dhimo sow uguma aad hbesteen heesta macaan ee Axmed Rabsho "Laba miirraa ley mudaa, waa laygu maadsadaa....

Malaha gabadha Mahad bey qaraabo yihiin iyo annagaa naqaan Mahad iyo Qoyskiisa uu ka dhashayba haddiise ay is yaqaannaan gabadhaas yaanyooleyda ah kolleyba isla dhexmarkoodu wuxuu ahaa ma aha walaashii mar alla markuu Taxi-gu dhaqaaqay, koox gabdho ah oo markii ay biririfta quraacda u dhacday meel gees ah ku sheekeysanayay, kana mid ahayd Mulkidii ay Mahad ilmo adeerka ahaayeen baa iyaguna dhacdadii saaka dhacday dhinac u nuuxnuuxin kari waayeen, Mulki dharaartaas Dugsiga jirkeeda uunbaa joogay mooyee maankeeda wuu maqnaa, gabdhaha qaarkood ee isu dammnnaanta iyada iyo Mahad ogaa si ula kac ah bey iyada ugu dheg hadlayeen, qaarkoodna si daacad ah bey ula sheekeysanayeen,

Mulki waxay ku adkaysatay inuu Mahad adeerkeed dhalay, welibanaay isku guri ku soo koreen, waan hubaa bey tiri adinku qaraabaadba sheegaysaane in xitaa gabadhaasi aysan ka mid ahayn macaariifta faraha badan ee uu Mahad leeyahay.

Mulki maalintaas oo dhan wel wel iyo walaac bey Dugsiga ku joogtay, umana muuqan duruusta ay macallimiintu dhigayeen, maxaa yeelay waxaa kaar ku hayay cinwaanka ay berrito qaadan doonto gabadhii uu Mahad saakay

laabta ku qaatay.

Oo haddayba gabadhu ceynkaas tahay, kolleyba Mahad meel baa damqataye, haddiise uu xaafad ahaan ugu gurmanayey muxuu sidaa wqalida ah miyirka isaga qaadayey?.. bey tiri gabar ka mid ahayd gabdhihii madasha kuwada kulansanaa.

Oo gabadhu halkey yaanyada u wadday bay gabar kale lasoo booday, iyada oo isleh malaha gurigoodaa laga isticmaalaa xaddiga intaala eg ee yaanyada ah.

"Naa mayee suuqa Dugsigeenna ka dambeeya ee miijiska loo yaqaano bey gabadhu ku iibisaa yaanyada ay Xamar weyne kasoo gaddo". bey gabar kale ku war celisay.

"Meel bugta iyo fartaa is og baa la yiri, haddaba meesha waxbaa ku jira, far baana ku godan", bey gabar kale lasoo booday,iyada oo qooraansaneysa Mulki co ay wejigeeda naxdini ka muuqato.

"Inkastoo la yiri dad iyo duurba wax aadan ka filanayn baa kaaga soo baxa, haddana ma filaayo inay wax kale jiraan, waayo Mahad aad baan ugu kalsoonahay", markii ay Mulki tiri bay biririftii dhamaatay, ardaydiina fasaladoodii kala galeen.

QEYBTII SADDEXAAD,

" Haye, adeer haatan sidee tahay" Buu weydiiyay takhtar Ismaaciil oo markaas korkeeda taagan kormeerna ugu yimid.

"Aad baan isaga fiicnahay", intey ugu warcelisay bey damacday inay u raaciso su'aal maskaxdeeda ku wareegaysay weyse ku dhiirran weyday.

Isbitaalka Digfeer oo ay jiifto wuxuu ahaa isbitaalkii ugu horeeyay ee la geeyo maxaayeelay inkastoo ay soo mareen jirooyin yar yar oo fara badan, haddana weligeed uma uusan soo martin xanuun weyn oo geyeysiiya in isbitaal la gesho, wey maqli jirtay gabar heblaa isbitaalka la dhigay weligeedse isbitaal iyo hereeriahiisaba kama soo ag dhowaan, markii isbitaalka la keenay dhakhaatiirtuna baareen, waxaa la ogaaday in aysan gabadhu wax dhaawac ah qabin, balse xanuunkeedu uu ku siman yahay suuxdin iyo argagax ay ka qaaday shilkii ay gashay markay irbado iyo dawooyin qaadatayb wey soo baraarugtay, waxaana loo sheegay in ay galabta isbitaalka ka bixi doonto, "Adeer inkankii ku keenay baa haddana ku kaxaynaya ee iska seexo", buu takhtarki ku yiri.

"Talow wiilkaasu kumuu ahaa", bey iyada oo yaaban is weydiisay, waxay sulaashu caqabad ku noqotay codsigii ay damacsaneyd in ay takhtarka usoo jeediso. Waxay dib ugu noqotay xasuusteedii waayo waayo iyo wiilashii ay isyaqaaneen oo aan iyagu dhowr wiilba ka badneyn, dhammaan nimankii kawaanleyda ahaa iyo kuwii kale ee Muus gadayaasha ahaa ee ay suuqleyda isla wadaahaayeen bey mar qura xusuusteedii kusoo wada koobtay, wiil hilib gade ah hoostana ay ayaamahan iska qaawisi jireen beyku tuhuntay inuu yahay wiilka la sheegayo ee isbitaalka keenay, galabtana ka saari doona.

"Dittore, ii oggolow inaan haddaba iska tago mar haddii uu caafimaadkeygu fiican yahay", bey takhtarki

si geesinimo leh ku waydiisay, iyada oo gariiraysa, kana baqaysa inuu ugu warceliyo jawaab taban oo kasii naxisa, gabadhu sabab kale uma degdegine waxaa walbahaarinayay xaaladda ay ku sugan tahay Hooyadeed oo ay jirro ku ogeyd iyo wiilka dugsileyda ah ee gaajadu silcineyso. yaa maanta raashin u karinaya, iyadaa marka ay duhurtii ka timaado suuqa wax uun dabka u saari jirtay, waxay takhtarka daaha uga qaaday inay xoog u tahay dad masaakiin ah oo aysan jirin qof aan iyada ahaynoo ay wax ka sugayaan.

" Adeer waxba ha degdegine, oo miyaadan sugeynin wiilkii isbitaalka ku keenay", buu takhtarkii weydiiyay isaga oo raba inuu si fudud uga dhaadhiciyo in aysan keligeed tagi karin.

"Dattore, wiilka aad sheegayso anigu ma garanayo", bey ku rogaal celisay iyada oo is leh aad takhtarka beer jileec kaga heshid.

"Wuxuu xirnaa dharka ay xirtaan ardeyda Dugsiga Sare. buu ku yiri,

"Ardayda Dugsiga Sare... bey marar badan maskaxdeeda kusoo rogaal celisay, sidii qof cajalab loo soo diray intuu fahmi waayay hadba mar kale kusoo ceshanaya, si uu hal mar uun wax uga garto,

Way taqaanay dhowr gabdhoo oo dugsiyada sare dhigataa kuwaasoo ka mid ahaa macaamiisheeda rukunka ah ee Suuqa yaanyada kaga iibsada, weligeedse ma baran xitaa hal wiil oo dhigta fasalka ugu hooseeya ee Dugsiga Sare, Waxay la yaabaneyd midka uu noqon doono wiilkan la

leeyahay Dugsiga Sare buu dhigtaan saakana isagaa isbitaalka ku keenay, galabtana isagaa kaa saaraya.

Gabdhaha uu Mahad u jeeel(jeel) qabay magaceeda xitaa muu aqoon, isla galabnimadii intuusan isbitalka soo gadin, buu isku dayay inuu magaceeda ogaado, isaga oo aan la dareemin, wuuse ku fashilay, gabar walaashii ahayd buu si aan toos ahayn ugu yiri horta maxay ahayd gabadhaan deriskeena ah ee subax kasta gurigeyga soo hor marta magaceedu, waxayse gabadhii ugu warcelisay "War naga tag waxyahow aan sharaftiisa dhowreyn, ma haddaad haddana usoo dhigatay gabadhii Canab ee miskiinta ahayd ee suuqa yaanyada ku iibinaysay", Jaceylkiisii ugubka ahaa bey weedhaasi laba kacleyn ku riday, waxay ahayd markii ugu horeysay ee uu magaceeda maqlo, intuu Baabuurkiisa saarnaa ama lugeynayay magaceeduu ku hadaaqayay, kuna tasbiixsanayay, sidii tiiyoo dhaarx loogu maray in aan dib dambe loogu soo celin doonin.

"Oow, jafantuu, aad baad usoo daahday" buu takhtarkii kusoo tuuray, markuu arkay isagoo sallaanka soo koraya, waqtigaa waxay saaqaddu ku dul gowriirtay afartii galabnimo oo gaw ah.

"Dittore, haatan bal xaalkeeda iiga warran", buu si beernugeyl ah ku weydiiyay isaga oo aad moodeyso sidii gabar gashaanti ah oo ninkii ku mehersanaa uu isbitaalka ku ildaran yahay.

"Xaalkeedu waa shan shan" Intuu ugu bishaareeyay buu wuxuu weydiiyay, horta gabadha ma walaalaad tihiin

mise... weyba ku garan weydaye?.

"Isku xaafad baynu nahay" buu Mahad ku warceliyay isaga oo u jareynaya sidii eedaysane Maxkamad horteed lagu waydiinayo su'aalo la xiriira dunuub lagu soo oogay. armaad dhibaato kaa dheereyd cagahaaga kusoo doonatay maya...maya.. waxba ma jiraan.. oo haddaanay waxba jirin maxaa xaalladdaada gabadha loo waydiiyay, armaa dembi laguu haystaa, oo inta gabadha lagu horkeeno, gabadhuna ma aqaano ku tiraahdaa, su'aalahaas bay maskaxdiisu mar qura si darandoorri ah ugu furtay naftiisa amakaagsaneyd.

Takhtarku aad buu u hoxl lahaa wuxuuna ku degdegayay qeybaha hoose ee isbitaalka sidaasi darteed intuu Mahad nabad gelyeeyay buu iska dhaqaaqay, neef weyn baa Mahad kusoo booday markuu takhtarkii ka tegay, wuxuuna dareemay nefis aanu hore u qabin, waayo maanta sidan lagugu deyn maayo buu is lahaa.

Intuu qun yar tallaabada boobay buu dalaq yiri qolkii uu Canab ku ogaa, mise waaba maran yahay, welwel iyo murugo hor leh baa ku dhashay, malaha waad isdaba marteen .... armuu dhaawac hor leh kusoo baxay, oo hadday caynkaas arrini tahay miyuusan takhtarku kula socodsiiyeen,ma takhtar baa kaaga waramaya khatarta kusoo fool leh bukaanka uu markaas daawynayo?, weydiimahaas baa Mahad maskaxdiisa ku wareegayay.

Isaga oo calool xumoonaya, dhulkana la sabaynayo buu qolkii marnaa iska dhax fariistay, waxaa qolka dhexyaalay dhowr sariirood oo maran, waxay qaarkood u ekaayeen kuwo aan in muddo ahba la isticmaalin,

midbaase u ekeyd sariir mar dhow laga tegay, waayo firaashkeedu wuu jactedsanaa waxaana ku dul xooraa shukumaan yar oo u ekaa shukumaanada ay raggu qaataan.

"Walaal yaad meesha ku dhowraysay", buu ku goohay cod nimeed oo xabeeb iyo qufac qiro weyn oo isdaba joog ahi ku shaqlanaayeen, wuxuu ahaa nin odey xigeen ah, oo u muuqday nin feeraha laga hayo, wuxuu xidhnaa go' cad wuxuuna gacanta ku sitay saabuun cagaaran, si kastaba arrintu ha ahaatee wey iska caddeyd inuux ninkaasi meyrasho ka yimid qolkana uu isagu deganaa.

Gabar saaka gaari ka dhacday oo meesha la keenay baan doonayay, buu Mahad lasoo booday isaga oo hiyikacsan, kana naxsan codka duqoobay ee gadaal kaga soo reemay. Odeygu wuxuu islahaa armuu ninkani yahay mid adiga kuu socda oo aadan is garaneyn, Mahadse wuxuu islahaa armuu odaygu kuu maleeyaa tuug meesha kusoo xaluushay.

"Walaal halkeebaan hadda ka doonaa" buu ugu laray, isaga oo isdejinaya, una muuqda sidii nin aan weligii aragna maqalna isbitaal iyo maamulkiisaba.

"Wuxuu doonayay inuu odeyga u muujiyo inuu yahay nin ambad ah oo meel uu wax kasoo qabto la',

"Mahad tagtid xafiisyada maamulka iyaga ayaa warbixin sugan kusiinayee, intuu yiri buu odeygii in cabbaar aamus galay, sidii tiiyoo lasoo hordhigay xusuustii quruxda badneyd ee waayo-waayo iyo faras magaalayaashii uu kusoo caweyn jiray, intuu sariir

ku dhoweyd salka saaray oo misna kor uga soo booday buu bishimaha kala furay, isaga oo malaha usoo holaday xusuus hor leh oo markaas maskaxdiisa kusoo maaxatay:-

"adeer iga raalli ahow, ma gabadhii yareyd ee saaka la keenay baad sheegaysaa, taasu waxba ma qabto waxayna ku jirtaa qolka geesta bari kasoo qabanaya". Adeer Mahadsanid:

Intuu Mahad odaygii nabdeeyay sariirtii uu ku fadhiyay kor uga booday, isaga oo tallaabo dheeraynaya buu durba balleeyay qolkii uu odeygu u tilmaamay.

Talow ma soo jeedaa mise weli way hurudaa.... haddey soo jeeddo waa sidaad rabtay, haddeyse hurudo maad hurdada ka kicisid, illeyn galabta waa kaxayn lahayde.... maya iska dhaaf maxaad u dhibbaysaa hurdo adeeda ha kaa bugatee.... hadday gabadhu si niyad-sami leh ii qaabisho sidee baan isu baraa, illeen waa hubanti in ayan haba yaraatee i aqoonine.... haddiibase ay i taqaan sidee baan ugu bandhigaa aragmida jaceyl ee aan laabta ugu guntay, horta armaysan gabadhu jaceylka iyo jiritaankiisaba rumeysnayn oo aad haadaan dheer ka duushaa... oo haddiiba aysan taa rmeysnayn ma saaxiibtinimada iyo wada socodka dhallinyarimo bay dafiri kartaa.. Mahad intuu Canab qolkeedii usii socday, waydiimahan iyo kuwo kale oo la ayni ah bey isaga iyo naftiisu madaxa iskula jireen, isaga oo aad mooddo sidii arday isu diyaarinaya imtixaanka afka ah oo dhowr daqooqadood gudahood laga qaadi doono.

Isaga oo aan albaabkaba gargaraacin sidii isaga oo kormeer kadis ah ku gaalaa bixinaya bakhaaradii aabbihiis, buu qolkii loo soo tilmaamay dalaq yiri, wuxuu indhaha ku dhuftay Canabtii uu u dig iyo dam lahaa oo badweyn hurdo ah dhex dabaalanaysa, waxay lahayd sansaanka gabar aroos ah oo weli bisheedii malabka ku dhex jirta. Kolkuu hubsaday in aysan cid kale qolka ku wehlin intuu si tartiib ah albaabka u soo xiray buu u dhaqaaqay xaggaa iyo dariishad qolka ku taallay, muuqaal qurux badan bay dariishaddu lahay waxaana laga arki karayay jawiga macaan, dhirta iyo guryaha hoose oo dhan, Mahadse waxaas oo dhan uma muuqane intuu dhabar-dhabar dariishadda ugu tiirsaday buu usoo jeestay xaggaa iyo gabadhii bukaanka ahayd, isaga oo si ilbogasho leh indhaha ula raacaya qaab samaysinka jirkeeda iyo quruxdeeda qaayaha leh, wey jiiftay Mahadnaxx si mug leh ugama ilbuuxsan karin quruxdeeda, haddiise beenta laga fogaado waxay lahayd qurux weyn oo ay asaageed ugu faani kartay, walow baahi iyo dac darro saboolnimo keentay inay si ba'an u shiiqiyeen quruxdeedaas dabiiciga ah. intuu si qumaati ah uga ilbuuxsaday wejigeedii quruxda badnaa walow uusan arki karin qeybaha kale ee jirkeeda, horese uu uga dheragsanaa qaab samaysinka quruxda leh ee jirkeeda, sidii siiyoo uu isu diyaarinayo imtixaan sawir gacmeed ahoo looga qaadi doono qaab samaysinka wejigeeda, buu markan muuqaalkeeda ku indha daraaddaray, si kadis ah buu gadaashiida u

dhugtay, wuxuu indhaha ku dhuftay daawashana kula dhaqaaqay jawiga quruxda badan oo maalintaasu maalmaha ugu faani kartay.

Galabtaas cirku waa awdnaa, mana lahayn, dulaalaati yar oo buluugiisa laga arki karayay, daruuruhuna madaxa ayay iskula jireen sidii iyagoo uu shir gaar ah ka dhaxeeyo, saxansaxo udgoon buu sanku neefluhu sanka la raacayay, neecaw macaan oo kolka ay xaf kugu soo tiraahdo dareenkaaga kicinaysa, xaddaadana xoodaaminaysa, kuna beeraysa naxariis iyo deganaan baa gees kasta magaalada u maraysay.

Wuxuu ku dhaygagay farxad iyo qushuucna geliyay shimbiraha faraha badan ee koox-koocxda u wada socda, ahna nooca loo yaqaan baal-fadhaarta, oo hadba hortiisa ku qaalma roganayay, sidii ciidaha dhoolatus hawadooda ku samaynayay, dhirta wada cagaaran, tirada badan oo ku hagoogan guryaha bilicda san ee cisbitaalka ka hooseeya iyo weliba dadka baabuurta waddooyinka isla maraya ee uu ku ildoogsanayay intuba waxay niyaddiisa geliyeen farxad iyo deganaasho ka tan weyn oo gayaysiinaya inuu halmaamo meeshii uu joogay iyo weliba gabadhii gadaashiisa jiiftay.

Waxa uu is arkay isagoo xiddigaha u kala gooshaya, wuxuu niyadda iska yiri:- "Talow jawigan macaani armuu hor u dhac u yahay, siina saadaalinayaa guusha aad maanta halkan kala galban doono", Eebow sidaas ka yeel buu ku duceystay. Talow hurdadiiba ku raagtaye armaan ka kiciyaa?. mise weli waan iska sii sugaa? intuu iskula hadlay isaga oo aad u raagsaday, hase yeeshee

inuu hurdada kakiciyo aan ku dhicin, buu mar qura gadaashiisa dhugtay, waxaa indhihiisu qabteen tiiyoo intay hurdadii kasoo baraarugtay la amakaagsan ninkan aysan garaneyn siina jeeda oo daruuraha daawashada ugu maqan, illeyn indho jaceyl isma eegi karaane markay indhaha isku dhufteen intuu midba gees lugunta u rogtay bey ilmo fara badani indhahooda kasoo daadatay, sidii tubbo biyaha laga dhaansho oo uu cunug yar si shil ah u furay.

Markii hore aragtidii indhihiisa buu rumeysan waayay, markaasuu canmaan iyo huruufid kula dhaqaaqay isaga oo ku eedeynaya inay warbixin qalad ah usoo tabiyeen, wuxuu u qaatay inuu riyo maalmeed dhex jibaaxayo, Mahad xaraarad jaceyl baa ku kacday, dhibaatar lama ilmeyne farxad ka mug weyn baa ku habsatay, markaasuu isagoo aan ogaal lahayn intuu is haysan kari waayay usoo dhaqaaqay xagga iyo sariirtii ay gabadhu ku jiiftay.

Allaa.. malaha waa ninkii isbitaalka ku keenay intey iskulka hadashay bey Canab daymo naxariiseed kula dhaqaaqday Mahadkii , isagaa xaggeedii usoo hadaafaya, ma mooddaa sidii cunug yar oo hooyadiis u baaqday, intey sariirta kasoo booddo inay isku duubto bey ku sigatay, waxaa Canab hal xiraale ku noqotay sababta Mahadkii ay taqaanay ee aamuska badnaa qabkana weynaa uu intaas oo ixsaan ah ugu sameeyay, ma bani'aadaminimaa.... mise... waxay arki jirtay gabdhah walaalihiis ah oo marka ay yaanyada ka iibsanayaan si

isla weynn ah ug hadlaya, sidii iyaga oo aan aqoon horeba isulahayn.

Ma wiil la hadla bey arki jiray, wiilasha xaafaddu shukaansi ay ugu yimaadaan iskaba daaye salaantaba xitaa kama qaadaan.

Waxay iyada iyo Mahad is arkistooda bilaabatay ayaamihii ay jiratay Canab hooyadeed ee iyadu si joogto ah suuqa yaanyada ugu iibin jiray, markaasoo ay Canab qasab ku noqotay inay kaalintii Hooyadeed buuxiso. ayaamahaas bay ahayd ayaamihii ay Canab si toos ah uga ilbuuxsatay wiilka ay muddaba magaciisa maqli jirtay, waxayna isla maalmahaasba qalbigeeda ugu beertay iniin kalgaceyl oo ay iyadu hubtay in aysan biqli doonin, waxayse shidaal ka dhigan jirtay naftana ku samirsiin jirtay aragtida ay Mahad subax kasta arkayso marka ay soo hor marayso isaga oo gurigiisa ku hor cadayanaya, iyaduna ay suuqa yaanyada usii kalahayso.

Intuu Mahad in cabbaar ah dhugtay, gacanna madaxa ka saaray, gacanta kalana illinta isaga tiriya, buu isagoo dhinaceeda sii fariisanaya hase yeeshee ah maqane jooga aan wuxuu samaynayo iyo wax kale kala ogeyn wuxuu ku yiri:- "Gacalo ma nabad baa?". waan fiicnahay bey si dabacsan ku tiri, iyada oo joodariga isku nabeysa sidii iyada oo is leh aad qarsatid jaceylka muddaba kuu qarsoonaa ee galabta kugu soo duxay, qalbi nabar ku yaallaan qaboobine, qufac iyo kalgacal baan qarsoomine, waxay Canab dareentay nafis aysan hore u qabin iyo neecaw qabow oo xaaddeda kor

iyo hoos u xoodaaminaysa, intay daymo kalgacaltooyo dib ugu celisay Mahadkii horteodii fadhiyay, bey buurta Himilaayo kala qiro weynaatay, maskaxdeeduna soo dhufan kari weyday sababta uu wiilkani intaas do ixsaan ah ugu samaynayo.

Ey waliba dhaxartiis lehe "Every dog has a day" intay isku boorisay inay si hufan uga faa'iideysato fursaddan qaaliga ah ee maanta usoo martisay bey shee kooyin goosgoos ah la gashay, Canab muxibadii ay uurka ku haysay waxaa kusii anqariyay hadalada ay naxariistu ku dheehan tahay ee uu kolba Mahad kusoo tuurayay, markii uu Mahad arkay inay gabadhu si ugu nugushahay waxba kama uusan gabbane, wuxuu oodda uga qaaday arrimada jaceyl ee uu muddaba laabta ku hayay.

Naxdin buu Canab wadnuhu haq yiri, naceyb ay Mahad u qabto kama aysan nixine, balse waxa durba hor yimid dhibaatooyinka caga gubyada leh ee ku laran wada socodka dhex mara laba qof oo laba duni ku kala nool, waxaa u sawirmay iyada iyo Mahad oo dad warxuma tashiil ah intay u kala war sheekoodaan hadba si rakhiis ah isugu dirmaya.

" Abboowe waxaad tahay wiil reer maalqabeen ah kadhashay, aniguna waxaan ahay gabar qoys sabool ahi fiirsanayaan, marka ma haboona in aan waqtiga kaa qaado, adiguna aad iga lumiso waqtigii aan rootiga xamaalan lahaa,horena waxaa loo yiri "Shimbirba shimbirkiisuu ladhulaa" ee miyaad wayday gabar kuu dhiganta oo kula heer ah," bey ku tiri iyada oo ilmaynaysa,

ogna inay aad u jeceshahay, laakiin jaceylka ay u qabto wa
ynaantiisa u quuri la' heerkeeda, iyadoo waayuhu kolba
ay tusayaan filim taariikhood ku lug leh xiriirro kasoo
dhexeyn jiray gabdho iyo wiilal aan isku heer ahayn,
kuwaasoo badankoodu ay ku fashilmeen jaceylkii ay
isugu heesi jireen.
Gacalo khalad baad iga fahamtay baan filayaa ma halm-
aantay maahmaahdii Soomaaliyeed ee ahayd "Barasho
horteed ha i nicin", intuu ku yiri buu u qiray inay
waxaas ay sheegayso oo dhanba uusan isagu rumeysnayn,
balse uu rumeysan yahay jecaylka dhabta ah ee ka maran
kibirka iyo isla weynida isla markaana aan lahayn
shuruudo u gaar ah marka laga reebo ka helista oo
ah Hooyada jaceylka.

"Abboowe , laba qof oo laba duni ku kala nool
beynu nahay, haddii aad adigu is leedahay naftaada
raalli geli, ruuxii ay jamatana u doonn ogoobeyn
aniga farxaddaadu waa ii murugo, waayo isku feker
iyo isku duruuf toona ma nihin, mana doonayo aniga
oo dhulka jooga in daawadeyda dayaxa laga doono,
inay ku calaacashay bey misana u sii raacisay,
Waxaan ahay gabar miskiin ah ma lihi lacag aan
kugula mushaaxo, ma lihi guri aan kugu casumo,
ma lihi gaari aan kugula dakeeyo, ma lihi waqti
aan kugula sheekaysto, waayo waqtigeygii oo dhanba
rootiga aanu aniga iyo inta iga dambeysa caloosha ku
samirsiin lahayn baan helistiisa raacdo ugu jiraa,
haddaba waxan ku oran lahaa adna ha is lug-goyn

anna ha i hadimeyn."

"Anigu ma aaminsani jaceylka dhalanteedka ah
ee uu dhaqaaluhu ceynaanka u hayo, balse waxaan rum-
eysnahay jaceylka dhabta ah ee kibirka iyo isla wey-
nida ka maran", buu mar labaad ugu soo rogaal celiyay
isaga oo indhihiisu dhinbilo cas-cas u eg yihiin.
"Gacalo jaceylku maal miyuu yaqaanaa, jaceyl magac
miyuu yaqaanaa, jaceylku mabda' miyuu yaqaanaa" Eray
kasta oo Mahad afkiisa kasoo baxa wuxuu Canab ku
noqonayay dhimbil dab ah oo hadba kusii kordhinayay
kuna sii hurinaya jaceylka laabta uga buuxa. Markuu
laba kala daran lagu kala dooransii xaalkeedu gaaray
intey hoos u hogatay bey aamus dheer gashay, markii
ay maskaxdeedu go'aan deg deg ah soo saari kari
weyday bey intay xaggiisa dhugatay lasoo booday
"Maynu baxno inta uusan gabalku nagu dhicin".

"Haddee is diyaari iminkaba weynu tegiye", buu
ku yiri intii ay Canab is diyaarinaysay wuxuu Mahadna
indhaha la raacayay quruxdeeda iyo jirkeeda sida il-
qabatinka leh u kala xubnaysan, waxay ahayd gabar aan
meel laga saluugo lahaynn midabkeedu wuxuu ahaa
midabka midabada laga doorto maariin (Brown).
casaan dhalaal raaca ah, walow inta qorraxdu qayirtay
ay u yeeshay midab kale oo ka duwan keedii dabiiciga
ahaa, jooggeedu wuxuu ahaa dherer dhexe ee dhex yar,
oo tima seyn yalax ahi garbaha laba taako hoos uga
degeen si fiicanna looga shaqeeyay, waxay lahayd
indho waawyn oo cad cad oo wiilkooduna madow yahay

suniyo dhaadheer oo mad-madow, iyo sanqaroor dheer oo aad moodid in meesha la saaray, waxay lahayd qosol mar naddii ed aragtid aadan ka jeesan karin, dhoolaha ku yaal oo keliya mar hadday dibnaheeda deebta la marshay furto oo muujiso ilkaheeda caddaanka ah illaa dhoollasha bar ka baf muuqdaan, intaas waxaa u raacay labadeeda kub oo laba buuxsin ahaa, kumase oolin iyaga oo si hufan u buuxsamay, ee raadkii ay ka tageen uumbaa ka muuqday, waxayse u ekaayeen kuwo si fudud lagu soo ceshan karo, gacmaheeda garaaryaha leh marka ay ku laafyooto ruux la quuri karo may ahayd, waxay gorodda ku lahayd kuna wareegsanaa raadadkii ay ka tageen cabaadhyo haddii la tiriyo afar meeris ahaa, qaruxdeedu waxay ahayd qurux aan la malayn karin, nasiib darrose oogadeeda kama ayan muuqan, waayo waxaa shiiqinayay diifta iyo urugada ay waayahakanba martida usoo ahayd.

Wuxuu Mahad damcay inuu Canab casho geeyo weyse ka diiday, wuxuuse intii ay gaariga saarnaayeen una sii socdeen xaggaa iyo canab gurigeeda ka dhameeyay in ay iridaha u furaan wada socod saxiibtinimo oo ay ugu sii gogol xaarayaan mustaqbal aayo leh, markii ay guriga tageen waxay si fiican Canab isu bartay Mahad iyo Hooyadeed iyo weliba Maxamed yare oo markaas maqaamad kasoo waxay, waxayna Hooyadeed daaha uga qaaday go'aanka ay iyada iyo Mahad soo wada gaareen, Canab Hooyadeed aad bey go'aankaas ugu bogaadisay, walow ay ka

walacsaneyd habsami u socoshada xiriirka ceynkaas oo kale ah, waayo waxay in badan waayo arag usoo ahayd mashaakilada ku mataanaysan is hanashada laba ruux oo aan isku heer nololeed iyo mid dhaqaalaba ahayn, marbay islaantu damacday inay gabadheeda kahhor istaagto xiriirka ceynkaas oo kale ah, weyse is qabatay iyada oo is leh yaaney berri kugu eed sheegan oo ku oran "Hooyadey baa ragga iga hor taagan".

"Hooyo, habeen wanaagsan weynu iska war hayn doonaaye," intuu Canab hooyadeed ku yiri buu albaabka guriga balleeyay iyada oo ay daba socoto Canabtii oo weli qabta diricii jeexjeexnaa oo ay suuqa kaga shaqayn jirtay, saakayna ay shilka ku gashay, kolkuu albaabka dhaafay buu intuu kusoo jeestay jeebka gacanta la doontay, intuu fag kasoo siiyay laba kun oo isku xidhan gacantana u geliyay buu ku yiri "Dhakh saddex maalmood ha nasato buu kusoo yiri, intanina waa masaariiftiinii, walow an anigu kaba sii jeclaa in aad iskaba dhaafto shaqada ceynkaas oo kale ah "

Canab, ugu horeyntii wey diiday lacagtii faraha badneyd ee uu Mahad usoo taagay, ugu dambeynse way ka oggolaatay , waxayse si buuxda ugu gacma saydhay taladiisii ahayd inay shaqada iskaga tagto, waxay u sheegtay inay shaqadu talhay sharaf nooc kastoo ay ahaataba, iyaduna ku faaneyso shaqadaas ay qabato, waxay u xaqiijisay cuqdad inaysan ka qabin shaqadeeda oo iyada ula mid ah shaqada uu ninka ganacsadaha ahi

qabto. waxay dadban u tusaaleysay in ayan dooneyn nolosheeda inay qof kale si toos ah ugu xirnaato, Canab si qaro ku jirto bey Mahad ula hadashay .

Maxaa hadalkaas kaa keenay buu Mahad niyadda iska yiri "Raallixg iga ahow, meel baan ~~kaaga dhacaye~~", intuu ku yiri buu u ballan qaaday inuu gefkaas ka xaal marin doono, intuu gacan qaaday dhukkana gacanteedii ku boobay buu habeen wanaagsan ku yiri, Canab albaabkey taagneyd intuu Mahad sii libdhayay oo dhan, waxayna ku ildoogsanaysay hannaanka socodkiisa iyada oo hadba "b usoo gocanaysa hadalkdii sii raxmaddu ka buuxday.

QEYBTII AFRAAD,

(Mulkiyey war muhiim ah baan maanta kuu hayaa ee waa inoo biririfta) bey Maryan-ruun dhegta ugu sheegtay Mulki oo fasalkeeda joogta, koox saaxiibadeeda fasalka ahna dhex fadhiga.

Maryan-ruun saaxiibta koowaad ee Mulki ayay ahayd, Mahadna isku fasal iyo isku xaafad bey ahaayeen.

Waqtigii biririfta baa Mulki la dheeraaday waxayna maskaxdeedu mashquul ku noqotay sii saadalinta waxa uu warkaasi noqon doono , maaddaama ay Maryan-ruun Mahad isku fasal iyo isku xaafadba yihiin, waxay badanaa Mulki kala talin jirtay xiriirka ay Mahad la lahayd, sidaa darteed waxay ka tiri malaha waxay kaala hadli doonaa Mahad iyo

xiriirkiinii in dhowaalaba sii murgayay.

Qofkii Mahad iyo jaceylkeeda kala sheekaysta Mahadna u amaana bey ifka ugu jeclayd, waxayna niyadda iska lahayd talow warkaasi ma khayr mise shar buu noqon doonaa, waayo ayaamahakanba Mahad isbedel weyn ka muuqdey , xiriirkooduna sidii hore muu ahayn, sheeko ay sheekeystaan iskaba daaye hadduu salaanta ka qaado bey nasiib lahayd , aragtay in ay Mahad meel u caddahay, wuxuuna ugu horreynba shakigu kudhashay markay maalin maalmaha ka mid ah wax ka waydiisay gabadhii uu dharaartii hore isbitaalka ula cararay isaguna uu si kulul ugu warceliyay "waad edeb daran tahay su'aasha ceynkaas oo kale ahna ha iila iman". Mulki isma lahayn gabadhaas bey Mahad wax ka dhaxayn karaan, laakiin gabar aragtay gabar kaloo horeeda wax loogu qabanayo warwarsiga badan iyo hinaasq aan looba joogin ma dhaafto'e waxayis lahayd bal wax uun ka ogow gabadhaas uu Mahad si waalida ah ugu damqay.

"Naa war moog yahay, wuxuu Mahad la saaxiibay gabar xaafadda yada deggan oo suuqa yaanyo ku iibisa" bey Maryan-ruun ku tuurtay Mulki oo koob Orange ah afka kula jirta nabar la filayay naxdin ma laha'e wuxuu warkaasi Mulki kusii gaaxiyay naxdintii iyo shakigii ay beryahanba qabtay, wax kastaba waxaa uga darraa gabadha yaanyooleyda ah ee laga door biday, wanaagsanaan lahaydaa haddii gabar la heer ah laga raaci lahaa, oo haddey gabdhihii saaxiibadeed ahaa ee ay dhoocilnimada ku cayn jirtaymaqlaan gabar yaanyooley ah

baa Mulki bara bixisay sow ceeb iyo fadeexad maaha, intay sixatay bey Orangadiis sanka iyo afka ka keentay, qufacna ka wareegtay , markiiuu qufacii ka joogsaday bey iyada oo hadalku si dhib ah uga soo baxayo waxay gabadhii weydiisay "Warkaasu ma mid dhab ah baa" .

"Oo maxaan beenta kaaga sabanayaa " bey weydiisay,

"Naa miyaadan xusuusan gabadhii yaanyooleyda ahaydX ee ayaan dhexdaas ah Dugsiga hortiisa gaarigu uu ku dhici jiray, Mahadna uu sida waalida leh ugu gurman jiray, taas weeye gabadha aan kuu sheegayo".

Mar bey Mulki damacday isla maalintaasba inay arrintaas si toos ah Mahad qudhiisa wax uga weydiiso, waxayse is tiri koleyba Mahad eedeyntaas waa kii kugu inkiram'e maxaad isa daalinaysaa.... oo sow markaas hadalkaagii hal bacad lagu lisay noqon maayo. Waxay hadba inta go'aan hor leh gaarto, haddana ka tanaasushoba, waxay ugu dambeyn talo la dhaafi kari weydayin ay Mahad hooyadiis Cambaro xaalka la socodsiiso,maaddaamaay ay iyadu qofkii soo abaabuley isa siinta iyada iyo Mahad tahay. waxay isla galabnimadiiba Mulki ballaysay gurigii adeerkeed, waxay halkaas kula kulantay eeddadeed Cambaro oo Mahad Hooyadiis ahayd , waxayna markii ay in cabbaar ah sheekaysteen daaha uga qaaday si tartiib ah arrintii ay galabtaas ugu socotay.

Ugu horeyntii islaantu way ka naxday warkaas isaga ah, waxayna iyada oo caraysan Mulki ku tiri "Mahad baa la saaxiibay guurna ka doonay Canabtii Yaanyooleyda ahayd ee uskaga badneyd.....

naa heedhe warkaasu mid ii cuntamaya maahee bal si fiican usoo hubso,ha ku soo boodine".

Mulki dacwad bey ahayd, umana iman in la canaanto ee waxay rabtay in ay Cambaro si toos ah wiilkeeda u waydiiso bal wixii ka jira warkaas isaga ah ee laga soo sheegay, waxayse islaantu ku adkeysatay in ay Mulki qudheedu si toos ah u weydiiso wixii ka jira warkaas isaga ah, kaddibna ay dib ula socodsiiso wixii uu ku soo yiraahdo, waxay islaantu Mulki ku biirisay in ay caawa waydiiso, iyada oo is leh dib u dhis kalsoonida in ay lunto qarka u saaran,

"Doqonyohow maad gabadhaada dugaagta ka ilaashatid" intay Cambaro kula kaftantay Mahad oo akhrisanayay Novel jaceyl ah oo hal kudhiggiisu yahay (The magic of love) bey markay Mulki qolka kasoo daba gashay iyaduna dibaddana uga soo baxday iyadoo malaha aad u firaaqaysid is leh.

Mulki intay durba dhugatay saacaddii u xirreyd oo tilmaamaysay 9:00 habeenimo oo gaw ah bey Mahad ka codsatay inuu sii dhoweeyo, waxay rabtay intay guriga dibadda uga saarto inay war kay qabtay u sheegto, habeenkaas Mahad gaarigu wuu ka ciladeysnaa intuu shaar hareertiisa yaalay isku boobay buu durba dibadda usoo amba bixiyay, markay dhex marayaan baa intay Mulki kusoo jeesatay Mahad ku tiri "Mahadow waxaa la yiri hadal run baa lagu caddeeyaa, ilkana cadey, Haddaba waxaa aniga isoo gaartay inkastoo aanan rumeysneyn war sheegaya in aad iga diga rogatay oo aad weliba la

saaxiibtay gabar yaanyooley ah oo aan xitaa kuu qalmin, taasoo adna sharaf dhac kuu ah, annagana qoys ahaanmx magac xumo noo ah. Haddaba anigoo huba in aadan halmaamin heshiiskii aabbayaasheen maxaa wqrkaas ka jira?"

"Warkaasu ama wax ka ha jireen ama yaaney ka jirine, horta miyaaney gabadhaasi la xuquuq ahayn gabdhaha kale ee asaageed ah, miyaanayse xaq u lahayn in la jeclaado" buuse si caro leh ku weydiiyay.

" Waa dhab in ay gabdhaha kale la xuquuq tahay, waa la jeclaan karaa, waxna wey jeclaan kartaa, waxayse aniga iilam muuqataa inuu jeclaan karo oo keli ah kawaanlaha ay isku shaqada yihiin", intay ku nuuxnuux-satay bey misna usii raacisey "Kaas weeye xadka inoo dhaxeeya, taas micnaheedu waxaa weeye sida aan anigu u jeclaan karin ninka mii jisleyda ah bey iyaduna u jeclaan karin ninka ceynkaaga oo kale ah".

"Haddaba aan kuu warramee, jaceylku wax shuruud ah ma laha, dadkana ma kala sooco, midab takoorna ma yaqaano, waadna u geftay, mana taqaanid ee bal marka hore dib daraasad ugu soo samee, waxa uu jaceylku yahay".

"Warkii horeba war soo dhaafyay, waa maxay sababta aad gabadhaas ugu doodayso" bey kusoo tuurtay iyada oo aad uga shakisan difaacistiisa carada leh.

"Waxaan ka xumahay sida aad sharafta bani'aadminimo uga qaadeyso, xuquuqdeedana u duudsinayso" buu ku hal-qaadey isaga oo ay cara weyni ka muuqato.

"Mahadow hadalkiiba dood kaftan ah baad u rogtay maxaa wqrkii hore ka jira" bey mar labaad kusoo rogaal

celisay.

"Hadday adiga kaftan kuula ekaatay aniga waa iga dhab buu si kulul ugu warceliyay .

"Maxaa kaadhab ah"? bey waydiisay iyada oo naxdin la gariireysa.

"Waxaa iga dhab ah in aan jeclahay gabadhaas yaanyooleyda ah ee aad hore usoo sheegtayn sideedana aan anigu ku rabo". intuu si xooggan u yiri buuna isaga oo aan is ogeyn intuu iska dhaqaaqay u raaciyey "Habeen Wanaagsan",

Warkaasi leeb beerka kaga dhegay buu Mulki ku noqday , dhulku iyo cirku mar qurey la wareegeen, markaasey meel ay joogto iyo meel kale kala garan weyday, waxay ku barooratay "Mahadow miyaad jaceylkeyga halmaantay",

"Dhowr iyo toban maalmood bey Mulki Dugsiga ka joogtay, xanuunkii ay ka qaadey naxdintii ay warkii Mahad ka naxday awgii, bey la xanuunsaneyd, xubin kastana wey damqanaysay, weyse ku adkeyd in ay si dhab ah u tilmaanto meesha uu xanuunku kaga badnaa, marka ay qaar ka mid ah saaxiibadeed amaba deriska guriga kusoo booqdaan waxna ka waydiiyaan xanuunkaliaya iyo sida uu u hayo, waxay hadbam u sheeganaysay in kilida bidix laga maroojinayo. raashinkii baa lagu diray, hurdadiina waa bey colloobeen, had iyo jeer beerkay uunbey sariirta ku haysaa, waxayna jeclayd inay keli-geed uun ahaato, mararka qaarkood intay albaabka soo xirato bey carruurta ka yar yar ku qasbeysay inay ka

qariyaan oo ma joogto ku yiraahdaan cid kasta oo u timaada, ma dooneyn inay qof keli ahqaabisho, dad la sheekeysiguna wuu dhibayay, kelinimada bayna haruuro u aragtay, carokx badan oo car i taabo cinwaankeedu yahay iyo aamusnaan xad dhaaf ah bey lasoo baxday, waa la xanuunsan jiray dadkana lama huruufi jirin, hadalkana lagama goosan jirin ee maxuu xanuunkan ahaa bey walaaleheed is weydiiyeen?,

" Dhowr jeer bey waqalidkeed isbitaalka u dhigeen, laakiin nasiib darro dhakhtaradu xanuunka haya wey bixin kari waayeen, waxayna usoo qoreen dawooyin yar yar oo aah sidaa usii ridneyd.ma jaceyl baa takhtar leh?. mise isbital baa lagu daweyn karaa. yaa aabbaheed u sheega in ay daawadeedu tahay wiilka uu adeerka u yahay, oo mar qura dhoosha uga qosla.

Kelinimada ay doorka mooday kama ahayn mashsho raadis, waxayse u taag la'eyd muranka iyada iyo naf-teeda ka dhex oognaa, nafi laba qof mar qura lama wada hadli kartee amuurteeda gaarka ah bey xooggan saartey, naftu waxay ku leedahay "Naa dhimatay, noloshaadna ku xabaalantay inta ay goori goor tahay fadhiga ka kac oo sumcadaada badbaadi", caqliguna wuxuu la dul joogaa:- Naahoy taladaan la ruugin waa lagu rafaadaa, ee talada si fiican u ruug", waxay isku eedaysay in wixii gaareyba ay iyadu isu geysatay, mar haddii ay odayaashu wada heshiiyeen, warkaasu waa war cad oo aan ka noqosho lahayn, hesh-iiskiinna loomaba baahna bey iyadu is lahayd, weyse ku hungowday oo waa kanoo inankii ay isku halleynaysay

gabar kaluu ka raacay.

Oo mar wacad ay hore ula lahayd buu uga baxay.. maya, oo haddaasna maxay ku eedeyn, bal haddaan judh horeba la saaxiibi lahaa wacadna la geli lahaa ma waxaasoo dhan baa dhici lahaa... Haddaanmx markii hor inuu i doonayo iyo in kaleba iska hubin lahaa ma ciil baan qabi lahaa ama waan ka tashan lahaaye.

Markii daawoo dhan lagala quustay bey hooyadeed talo kusoo jeedisay in inta dhowr wadaad loo soo yeero la quraan saaro oo quraanka ilaahayna lagu dayom sidii baana la yeelay.

QEYBTII SHANAAD,

Goor duhur ah bey Cambaro telefoon ka wacday habar la yiraahdo Cawrala oo xaafadda la deganeyd, waxayna u sheegtay inay war muhiim ah u hayso, gala-btana guriga ugu iman doonto, si ay arrintaas isula meel dhigaan.

"Naa Hooyadaa ma ku jirtaa?", bey Cawrala wey-diisay gabar yar oo hor taagneyd aqalka Cambara Jaamac oo Mahad hooyadiis ahayd.

Cawrala habar si ba'an xaafadda looga neceb yahay bey ahayd, wax kalana laguma nicine waxay ibtilo ku qabtay isku dirista iyo u kala wargeynta dadka ay degmo wadaagta yihiin, immisaa guri dhisan aawadeed u burburay, immisaa guri dhismi lahaa daraadeed u qabyoobay.

"Haa ayeeyo wey ku jirtaa", bey gabadhii ugu warcelisay. markii ay albaabka guriga dhaaftay bey

daaradda guriga ka bidhaan aragtay cambaro iyo Mahadkeedii oo shaah casaryo ah isla wada fiiqsanaya, intay qun yar isaga hadaaftay bey gambar dhinacooda yaaley salka la heshay, juuq ma ay oranine hadalka ay oran lahaydba dib bey u liqday.

" Naa gurigeygaan shaah ka soo cabaye, adinku maxaad sheegteen",

" Shaahu gurigaaga iyo kaayaga kalama yaqaanee habaryahay shaaha cab baan ku iri". bey Cambaro kula kaftantay.

" Oo hadda adigu ma gabar baad isku waddaa", bey bey Cawrala isku daafacday.

"Markii ay in cabbaar ah wada sheekeysanayeen, shaahiina ay min laba koob ka laaceen, Mahadna uu weli ag fadhiyo isaga oo hadba koftankooda usii macaansanaya iyaguse inuu u faqdaayo ay niyadda ka jecleysanayaan bey Cambaro intay saacaddii u xirneyd dhugatay waxay Cawrala ku tiri "Haddee maynu gudaha gallo waa tey ballani inaga dhaxaysaye."

" Naa cunahaabe i go'ane ee maxaynu gudaha ka doonnaa" intay ka daba tuurtay Cambaro oo gambarka kasii istaageysa bey iyada oo caga jiid ah u daba gashay xaggaa iyo qolki fadhiga. Waxay habartu rabtay inay si fiican u caro geliso Cambaro oo ay is lahayd armay warkaaga dhulkaba ka qaadi waydaa.

"Oo ma habarnimadii aan kugu sheegay buu cunuhu kula go'ay", bey Cambaro ku tiri Cawraladiiyoo salka ku sii ballaarsanaysa kursi qurux badan oo ka mid ahaa alaabta

cusub ee Xaajiga Cambaro qabay uu dhowaan Kenya kasoo dhoofsaday.

"Naa heedhe habarnimadaasu kaftan bey ahayd kaman aan caroonine waxaan ku iri:- Wey adag tahay si aad dib ugu soo ceshataan magacii iyo sumcaddii aad awal xaafadda ku lahaydeen , waxaadna gaarteen heer labadi wada kulantaba ay warkiina uun ku sheekeystaan, cid kalana sharaf dhacaas idinma geysan karto ee adinka uunbaa isu geystay" bey habartii kaga nixisay Cambaro oo koob liin miiran ah afkalasii dedaysay,

"Sidii qof looga digey ballaayo, baas oo kusoo maqan intey Cambaro qiirootay, koobkii liin ahaa ee ay cabbeysayna dib usoo dhufatay bey iyala oo foojigan lasoo booday "Eeddo, balaayo la isuma qariyee Maxay waxaasi ahayeen, xaggeese innaga soo salaantay"

"Naa haddii aydaan qoys ahaan isagaba adin maxaad inoogu sheegi weydeen aanu dad idin cesha idiin raadinee",

"Eeddooy afkaagaaba iigu horr leh, maxay ahayd balaayadatan aan innagu isu geysanay",

"Naa heedhe haddii aadan wiilka xun ka dhigeynu maxaad u qarinaysaa maad arrintiisa Xaajiga isaga gudbisid , mise goortay talo faraha ka haado baad rabtaa in aad calaacal la harsan weydo, Xaajiga jaha wareeriso, caku iyo dheg weyn dumar"

"Dareen baa Cambaro galay, waxayna tuhuntay in warka Cawrala la gubanayso uu la xiriiro kii ay Mulki hadda ka hor lasoo socodsiisay iyaduna ku

diiday.

Xanuun baa jirkeeda wada saaqay, waxaana u caddaatay inuu warku yahay mid xaafadda ku baahsan mar haddii ay Cawrali ka war hayso.

"Oo eeddo maxay ahayd balaayada aynaan ka war qabin ee uu Mahad inoo geystay, maxaadse goor hore noogu soo sheegi weyday, ama adiguba wax uga qaban weyday, illeen waalidiintiisaad ka mid tahaye" bey ku tiri iyada oo isleh aad si fiican uga gurtid warka ay habartu kuu xambaarsan tahay.

"Naa ma nin qooqan oo gabadhii ina adeertiis ahayd ee u doonaneyd ku ekaan waayay baan anigu maara u hayaa, waalidnimana ii yaqaan, maad Xaajiga u sheegtid maxaad la qarqarinaysaa".

"Mahad ina adeertiis baa u doonan, gabar kalana iskuma aynaan ogeyn ee sidee bey wax u jiraan?",

"Naa ma ninka har iyo habeen gabadhii Yaanyooleyda ahayd garka haysta bey gabari u doonan tahay, lacagtiinii buu ku baahi tiray, galab kastana gaarigiisu gurigeeduu hor qotomaa, wanaagsanaan lahaydaa haddii ay gabar fiican ahaan lahayd; waa gabar xun oo ka dhalatay reer aan milgo iyo maal toona lagu ogeyn. Waxaa la yiri mid hilbe gade ah baa hadda ka hor soo furay, waxaanan umalaynayaa in ay wiilka idinka fashay, illeen si kale Mahad taas ula hadli maayee".

"Eeddooy, Mahad wuu joogaaye maynu haatanba wareysano, inuu warkaasi dhab yahay iyo in kale". bey Cambaro tiri iyada oo uu jirkeedu dhammaantiis gariirayo dhidid fara badan baa ka da'ayay.

"Oo caqligaaguba ma intaasuu gaarsiisan yahay naa ma isagaa runta kuu sheegaya wuu kaa qarinayaaye, ma qofbaa qorshe uu hubo in aadan ka oggolaaneyn kuu sheeganaya, naa hooy fadhiga ka kac baan ku iri inuu mehersaduu rabaa ayaan ba lahaaye".

"Meher-aa..." Indheheeda ilmaa ku joogsatay halgankii ay usoo gashay hanashada Mulki oo ay wiilkeeda la rabtay ma hal bacad lagu lisaybaa..... garatay in ay talo faraheeda ka haadday.

Intay gorodda lowyaha ku tiirsatay bey is uurxumeyn bilowday. Cawrali intay joogsatay bey Cambaro ku tiri (Haddee waa adiga iyo naagnimadaada,) waxayna u sheegtay in ayan lasii joogi karin oo ay meel kale kusii degdegsan tahay, Cambarase badweyn murugo ah bey ku rafanaysay oo warkaas maba ayan maqal..... markii ay in cabbaar ah hoos u foorartay intay is qabatay isna soo xusuusisay inay qofi dhinac fadhido bey madaxa usoo qaaday kor, mase hareerteedaba cidi ma joogto.

Intay kursigii ayku fadhiday kor uga soo booday bey iyadoo miyir doorsoon soo abbaartay xaggaa iyo daaradda guriga, waxay durba indhaheedu qabteen Mahad kiiyoo intuu soo labistay albaabka guriga ka sii b[illegible]ay; .... mataantiisii Canab buu la ballansanaa, waxay ku amartay "Waryaa Mahad, halkeebaad u socotaa?, meel aad caawa aadi karto ma jirto, Come on, dib usoo noqo baan ku iri, ma annagaad mooday inaad sidii kubadda

noogu ciyaari karto"

Dhakafaar iyo mar la arag bey Mahad ku noqotay, carada qaawan ee ay Hooyadii kula hor kuftay,, iyada iyo Cowrala in ay is yara qoomeen buu u qaatay, inkastoo habeenkaas uu Canab ballan la lahaa haddana isma lurin, ismana waaline intuu si xushmad leh gadaal isaga soo noqday buu qolkii fadhiga ku l[illegible]day, waxay maskaxdiisu bilowday inay howl geliso qeybta saadaasha maskaxdiisa ugu qeybsan si uu ogaado ba[illegible] ay duqdu lasoo shir tegi doonto.

Wallee caawa [illegible] habeenkii ay Hooyo Cambaro jiniyaheedu kacsanaa[illegible] jireen... fallaarteedu adigey kugu soo maqan tahay ee bal tolow [illegible]xay markaan kugu eedeyn doontaa.... armay habartii Cowrala ahayd ee galabta la joogtay kugu dirtay iyadaa dad isku dirista iyo warxumo tas[illegible]iilka lagu[illegible] ogaaye... armay gabar baastii Mulki ahayd kugu dirtay , waa tey in dhowaalaba jaceyl dhalanteed ah kugula gaaf wareegaysaye.. oo haddii ay kugu dirtay maxaa laa galay maad runta daaha uga qaadid.. oo Canab [illegible]an rabaa miyaan ku iraahdaa... oo haddaasna ma goroddaad laadlaadin,... war habartu dhibaato ma lehee [illegible]ey odeyga igu dirtaa... waxay doonto ha samayso.. weydiimahaas baa Mahad maskaxdiisa ka dhex guuxayay, markii ay Hooyo Cambaro qolka dalaq ugu soo tiri iyada oo ku qeylinaysa "Waryaa habaar qabe yohow ma haddaad keentay inaad naga xayuubiso sharaftii iyo karaamadii aynu bulshada kudhex lahayn... war ma haddaad damacday in aad ka boodo go'aankii ay odayaashu wada gaareen.

"Hooyo maxaad la gunuunucaysaa, hubsiimo hal dhan baa la siistaaye maad warka si deggan u sheegtid buu Mahad si dabacsan ugu yiri isaga oo fahamsan waxa ay habartu ka hadlayso, laakiin raba inuu warka si quman uga guro.

"War ma si deggan baan u hadli karaa, sharaftii aynu dunida ku joognay baabad naga qaadaye, waana taas oo arladii oo dhan baad ceeb inoo marisee"intay ka hor geysay bey dhirbaaxo xooggan dhabarka ka cusjisay. intay hal cabbaar ah shib ka tiri bey markay aragtay isaga oo ilmaynaya waxay ku tiri "Hooyo waad ogtahay in ay ina adeertaa Mulki adiga kuu joogto ee maxaa kuu [illegible]eyay ee shukaansigeeda ku fashay gabar yaanyooley ah oo sharaftayada boog ku ah".

Xummad hor leh baa Mahad ku kacday jiriirico weyn baana mar qura jirkiisa wada saaqday, dhulka iyo cirkaa la wareegay, markii ay Canab meheraddeeda ku caayaanba nabar baa ka damqada.... oo qof meheraddiisa iyo shaqsiyaddiisa maxaa isku xiray.... shaqadu ma ceeb baa... qofkuusan jeebkiisu buuxin ma qof xunbaa... nindoorkii ay dantu geed ku xirato ma doqonbaa.... Saboolnimadu ma cudur qofkii qaba laga fogaadaa....

"Hooyo miyaysan gabadha aad sheegaysola xuquuq ahayn gabdhaha kale ee asaageed ah, miyaanayse xaq u lahayn in ay gayaankeeda la guri gasho?"

"Waa runtaa oo waa gabar, laakiin miyaadan ogeyn sida uusan raggiiba isku meeqaan u ahayn gabdhuhuna inaanay isku door ahayn," bey ugu war celisay iyada oo is leh aad waano waalidnimo u gunidid, intay ka yara aamustay ayay si kaftan xigeen ah ugu soo tuurtay "Oo kaalay gabadhaas yaanyooleyda ahi gayaankeedu waa waa nin doorka kawaanlaha ama xamaaliga ahe adigu ma hilib gadaad is mooday.... alla maxaad qabri isku xabaaleysaa, laakiin taas inaanan oggolaaneyn inta aan noolahay haddii aan dhimmanana waxaad doontaba samee, waa kugu kelidaa.

"Hooyo waa shaqadu waa sharaf noocii ay doontaba ha ahaatee, shaqada uu qofku qabto iyo shaqsiyadiisuna iskuma xirma"

"Waryaa anigu dersi ii dhig kuma aan oranine waxaan ku iri, maxaa ka jira hadalka indhowaalaba lagaa soo sheegayay",

"Wuxuu Mahad waydiiyay Hooyadiis waxa uu warkaasi yahay, iyo ooda ay ka soo xigatay, waxay u sheegtay islaantu inay soo gaareen warar sheegaya inuu la maaxiibay Canabtii yaanyooleyda ahayd kana baxay Beshiiskii ay odeysashu gaareen oo ahaa in isaga iyo ina adeertii la isugu duceeyo, waxayna u xaqiijisay in Mulki iyo cowrala warkaasi soo gaarsiiyeen.

" Ma go'aankii ay aabbahaa iyo adeerkaa wada gaareen baad dheel dheel kula noqday, mise Mulki baa kula noqotay gabar loo quuri karo in ay kin kale xariir kula huruddo, bey hadal ugu soo koobtay .

Hooyooyinku iskuma jiraane waxay Cambara ahayd Hooyo deggan oo inta badan carruurteedu aysanba dheg u raaricin, waxay damcaanna ku hor sameeyaan. odaygaa dab aan loo bareeri karin ahaa mooyee haatartu biyo baraf ah bey ahayd, intuu markii hore hindisihiisii u bandhigay buu marka xigana ha oggolaato ama ha diiddee qasab ku marsiin jiray,.

Isma uusan waalino waxaa uu markii hore si deggan ugu sheegay dookha iyo doorka uu kaga jiro waarinta guurka, waxaa uu oogta uga qaaday in dookh iyo iska helis la'aantood uusan guurku dhaxal gal noqon karin.

"Hooyo miyaadan arag gabar aad foolxumadeed iyo dulinimadeeda adiga ka is leedahay tolow taasina nin ma heli doontaa, oo haddana lagu leeyahay waxaa ka daba dhareeraya oo addunba hablihii joogay kasoo calmaday nin hebel oo milgo iyo maalba eebbe ku manaystay" buu weydiiyay.

" Taasi waa iska calaf e maxaad uga gol leedahay"

"Haddee Hooyo dookhaygu gabadhaas yaanyooleyda ah buu ku ladhan yahay ee Mulki ma dhabarkaan ku qaadaa".

Intay caro la caburantay, dhirbaaxo labaadna daanta u sartay bey iyadoo qolka ka sii baxaysa ku sii waddacday "War waa maxay dookha aad sheegayso aniga iyo aabbahaaba ma dockh beynu isku soo guursanay, waalidkeen uunbaa isku keen calmaye. maantuuna dhaqankii ciyaal caasiga iila yimid,war ama diid ama yeel

Mulki waa marwadaadii, Xaajigana in badan baan ka qarinayaye waxaan ballan kaaga qaaday inaan warka sida uu yahay ugu sheego.

Labadii is doortaa qaar kala dilaayoo isku dira ma waayaan... tix ay tuducyadaasu ugu horeeyaan baa hortiisa kusoo qorantay, laakiin nasiib darro inta uusan dhamaysanba illin fara badan oo dhaayihiisa ka soo daadatay baa ka qarisay oo isku gudubtay tixdii uu aqtinteeda isku samirsiinayay.

Intuu kursigii ka joogsaday isaga oo indhaha sacabadax iska marinaya buu balleeyay gurigii mataantiisii Canab. markii ay kulmeen uma uusan sheegin mushkiladda kusoo korodhay, ee soo raagistii uu ka soo raagay uunbuu kaga cudur daartay isagoo leh "Gacalo galabta hurdadii ba[illegible]la tagtaye iga raalli ahow".

Cambaro habeenkaasi welwel iyo murugo ayuu ku dhaafay, markii uu waagu baryayna feker iyo keli isla hadal ah bey gunta u fariisatay.

Wejigeedii nuurka iyo midaba casaan xigeenka ah lahaa wuxuu isu regay midab mugdi boor leh ah oo dhuxulo lasoo shitay u eg, tanuna ma kuu dambaysay bey uurka iska tiri, caradu bishimahay ka saareyd, qof markuu la hadlana xanaaq hor leh bey ka qaadaysay sidii Hooyo curadkeedii ka dhintay bey uurxumo la taag darreyd, kanu wiil maahee hadduu kuu saqiiri lahaa ma welwel baad qabi lahayd bey isku qoomamaysay.

[illegible] galab ah iyadoo qolkii fadhiga fiidiyow ku daawku daawaneysa, gurigana oidla yahay, buu xaajigii qolkii dalaq ugu soo yiri, isagoo ku qaylinaya " Wallee daacadi ma huggowdo, waatuu diinkuba markii shimbiruhu usoo heshiiyeen yiri halkii la iigu tashanayay sow eebe ma joogin, Naa ma hadaad keentay intaad inanka af duubto in aad gabar yaanyooley ah luqanta u sudho, ma go'aankeygii baad daha maryeyn kartaa'''''').

Xaaji hubsiimo hal dhan baa la siistaa ee bal horta hubso, Xaalku sidaad mooday maahee. Intay istaagtay, koob Caano ahna qaboojiyaha uga soo saartay bay hor fariisatay.

Markuu kol qur ah wada fuuqsaday koobkii caanaha ahaa ee hortiisa qotomay bay maskaxdiisa deganaani isku soo hagoogtay, intuu neef weyn hawada kusoo tufay, ugana cudur daartay caradii uu kula hor kufay buu ku yiri "Cambaroy muxuu ahaa markan la isha dhexmarayo ee mahad laga sheegayo".

Elaah baan ku dhaartaye inaanan la ogeyn aniguba shalay baan maqlay markaan isla shalay weydiiyayna wuxuu ii qirtay inuusan gabadhaas meherean, balse uu malaha ku tajiro-Xaaji, Dooqaygii baa gabadhaas raacay buu lahaaye maxa sameynaa?."

Xaaji faarax markii uu Cambaro ka maqlay diidista u mahad mulki diiday iyo weliba iyo weliba qorshaha uu damad yahay bay maskaxdiisa qaylo ka dhex yeertay, intuu caro weligeed aan qaban la indha caddeeyay buu ku qayliyay "War Mahad, kaalay alla ku dufeeyaye, addeunkii baad raga ciqaabt, Eimaan beelayohow, soo sooc baan ku iri, mise wallaahi inta meeshayda kuugu imaado baan nafta kaaga siibayaa sheydaan yohow.

Mahad oo markaas hurdo kasoo baraarugey sariirtase iska dul saarnaa, markuu aabbihiis oo qeylinaya maqlay intuu sariirtii kasoo booday buu soo abbaaray xaggaa iyo qolkii uu odagu ka dhaqaaqayay. "hee aabbe, maxaa dhacay?" buu si qabow ku yiri.

"Warx dab aadan adigu shidin ma shidna'e, goormaad ka baxday, sideebaadse uga baxday ugase bixi kartaa go'aank ay odayaali gaareen, ma adaa is xukuma mise waa lagu xukumaa? yaad ka dhaxashay awoodda aad go'aankayaga ku burburinayso, ma kuni aan tacbatay baad ku nooshay welise aragtay, yaa ku siiyay awoodda aad gabadhaa doonto ku guursaneyso, ma gabar xulitaankeed baad wax ka ogtahay, waa taasoo xulashadaadii ku waadba gabar miskiinad ah oo yaanyooley ah baad door moodaye waar waa maxay dookha aad sheegayso, halkuu ku yaaliaa yaase hore usoo arkay, mise shuqulkii gaaladaad waddaa iyagaa wax baasoo ay jaceyl ugu yeeraan isku doontee. Hoy cunug yaroo aan waxba ogeyn oo guuxiisa ka dheereeyay baad tahaye maad aashaa socotid, murti iyo mahmaah waxba kama ogide ma maqashay murtida tiraahda:- Cagtii joogsan weyda mar bey ceeb la kulantaa, mase maqashay murtida kale ee tiraahda "Taladaan la ruugin waa lagu rafaadaa". Waar ma run baa oo intaad Mulki diiday, ballantayadiina burisay, baad gabar kale guur la damacsan tahay".

"Aabbe yaa warkaas kuu sheegay"

"Waar ama guurso ama ha guursan, waxaan anigu

ku iri, haddii aad ka baxdo go'aankii aan aniga iyo adeerkaa wada gaarnay ogow inaan ku deyrin doono kuna habaari doono, haddaadse nin fiican noqoto gabar waan kuu dhisayaa, maalna waan ku siinayaa, haddaba talo adigey ku jirtaaye labadaas waddo middii kuu dan ah soo mar".

Intuu odeygu qeylinayay ee uu cayda iyo canaanta isku qooshayay, Mahad dhugba uma uusan lahayn warkiis jirkiisaa uunbaa joogay maahee naftiisu guriga Canab bey ka sheekaynaysay, juuq ma uu oran, hadal yarna afkiisa kama soo bixin, haddiiba uu wax oran lahaana cid wax weydiintiisa dan ka lahayd oo warka ka gureysa ayaanba jirin, Odeygu odey qab weyn oo madax adag buu ahaa ma uu oggoleyn goobta uu ka baar-qabeynayo in ay xitaa shimbiri ka heesto, Mahadse bareerihiisu kasoo baaraandigisba uma baahneyne bushimaha dushoodu ka saarnaa.

Wuxuu ku talo jiray inuu habaarka doorto, haddiiba duco iyo habaar la kala doorransiiyo, oo haddii aan Canab waayo muxuu ahaa habaarka kale ee ii laaban... Maxay markaasi noloshu qiima ii leedahay.. oo maxay ducadiisu ii tareysaa... oo maxay deyrintu ii dhimaysa nin weyn oo wax isu qaban kara baan ahaye. weydiimahaa iyo kuwo kale oo la ayni ah buu Mahad mar qura is weydiiyay, intuu madaxa kor usoo qaaday, hareerihiisana eegay buu markuu nafar dhaqaaqaya ka waayay wel wel iyouurxumo la uurgubyooday.

Q E Y B T A L I X A A D .

Markuu Mahad ku gudbay imtixaankii shahaadada Dugsiga Sare soona maray dugsiga Xalane, waxaa shaqo Qaran ahaan loogudiray magaalada Qardho ee Gobolka Bari, wuxuuna si deg deg ah goor casar ku dhowaad ah ugu bishaareeyay aabbihii oo markaas ka yimid allabari guriga walaalkiis lagu qabay .

Odeygu aad buu ugu farxay warkaas reynreynta leh wuxuuna kuso dhoweeyay qosol dhoolla dilleac ah oo aan dhowr sanoba lagu arag, intuu isu bogay buu niyadda iska yiri "Wallee waxaan Mahad oo Dugsiga Sare dhameeyay ku riyoodaba waa tan oo maantuu ka fara xashay, marka waxa keliyoo ii laabani waa anigoo dhaayaha saara ilma ay isaga iyo Mulki wada dhaleen oo hadba awoowe iga daba leh ! Awguuriyo, war farax leh weeye" intuu si niyadsa i leh ugu yiri buu haddana usii raaciyay "Haddee maad dukaanka tagtid oo wixii lacag iyo agab ah ee yaalla kasii qaadatid,"

Goor ay fiid dow ahayd, dayaxuna iftiin shan iyo toonaad ah dhulka u qeybinayo, markuu Mahad soo dhamay ay howshii diyaar garowga ahayd, buu ka dul dhaqay Canabtiiyoo intay maqashay Mahad baa berri Qardho u shaqo tegaya la yaaban ciilna cunuhu la go'an yahay sababta uu ugu iman la'yahay "Aw-guuriyo gacalo imtixaankii waan gudbay, Qardhaana la igu qoray oo berrito waan shaqo tegayaa" buu Mahad ka hor geeyay Canabtiiyoo intay garbasaar daf soo tiri ku laba shaqinaysa "Ma gurigiisaad ka doontaa mise waad iska yara dhowrtaa".

"Awguuriyo gacaliye, haddaanba kuu soo socday" intay ku tiri iskuna duubtay sidii laba mucaashaqiin oo muddo is moogaa aadna isugu soo hiloobay, bey sidi gabar rafiiq leh oo nin ayan rabin lala damacsan yahay ku tiri "Gacaliye...Gacaliye... ma iga tegaysaa"

"Gacalo, in badan kaa maqnaan maayo,waa iska lix bilood ee samir yeelo, ogow in kastoo ay is arkistayadu yaraaneyso, haddana maalin kasta warqad gaar ah oo aad ku uurqabowdo baan kuu soo diri doonaa, Gacalo wheshey o wa warqadahaagee warqadoqqorista haka noogin" buu ku qanciyay isagoo gacanna dhabarka ka saaraya, gacanta kalana illinta uga tirtiraya.

Aw-guuriyo..aa.. Mahadbaad lix bilood is moogaanaysaan miyaa.. lix bilood aa... habaan qudhaa aanay arag ayayba welwel iyowalaacba la seexan karine, ma lix bilood bey aragtidiisa ka qatanaan karta... oo maxay sameyn... may Qardho u raacdo... oo xaggee bey kaga tegaysaa Qoyskii ay Hooyada iyo aabaha u ahayd, yaa u maqan oo aan iyada ahayn... oo sow gaajo u dhiman maayaan, "Maxay warqadi ii tareysaa mar haddii aanan ku arkeynin.

"Micna ma laha, waa iska xaal adduun, marbaanuse sariir qura ku wada seexan doonaa, ee inta aynu ka gaareyno waa inaynu samir iyo dulqaad yeellanaa."

Illaa labadii habeenimo oo gow ah bey habeenkaas wada joogeen, iyaguse xitaa saacad qura inay wada joogeen lama ahayn, goor dambe intuu Mahad dhugtay gooreysadii gacanta ugu xirneyd buu lasoo booday

"Canabey, waa goor dambe, berritana inaan goor hore tooso
baa la iga rabaa ee mac-salaama"

"Mac-salaana iyo soonoqod nabadgelyo leh" intayssi
dabacsan ugu tiri, labada dhabanna ka dhunkatay, bey
daymo kalgacal oo aad mooddo in ay tii ugu dambeysay
tahayna jirkiisa min tin illaa cirib ku ekeysay, bey
illini indheheeda fagax kasoo tiri, sidii tiiyoo uu
dduunka oo dhamba ka dhoofayo, dib dambana uusan ugu
oo laaban doonin bey walaac iyo walaahow isku abuurtay.

"Haddee, waa ku kaas oo axdi baa inoo xiran, ogowse
tahadii is doorta qaar kala dilaayoo isku dira ma waayaane
taanu saddexeeye inaga dhex faa'iideysan", intuu hadal
gu soo koobay buu albaabka ka dusay, Canab illaa iyo
nta uu Mahad kasii libdhayay albaabka guriga kama ayan
or dhaqaaqine intaas bidhaantiisa uunbey indhaha la sii
aaceysay.

Markuu in cabbaar ah kasii maqan yahay bidhaantiisina
ar hore ka libidhay, intay is waansatay bey iyadoo luu-
eysa dib gur goodii isaga laabatay.

Q E Y B T I I T O D O B A A D.

Intuu Mahad gaariga saarnaa, halka ay dhallinyarada
ale kaga ildoogsnayaan deegaanada quruxda leh ee ku yaal
agaalooyinka ay sii dhex marayeen, wuxuu isagu ku howlanaa
orieynta umuurihiisa gaarka ah... gabadhii tillaaba
aadana ma Canabbaa.. qaddiyaddaan ahayn tan la xiriirta
anab iyojaceylkeeda ma qaddiyad lagu qasaaray oo ka
ekeristeedu raqiis tahaybaa ... soo gocoshada iyo weliba
b u ruugista haasaawahoodii kalgacaleed intay naftiisu

isku samirsiiso, bey misana Canab iyo habaar ama
Mulki iyo duco miisaan caddaaladeed wada saareysay....
oo kaalay Canab la'aanteed sow habaarkaa maaha, helis-
teeduna sow ducadaa maaha, aloore ducadoodu "waa kuu
habaar , habaarkooduna waa kuu duco, intuu nafta ku".
samirsiiyay buu saaxiibadaa la sheekeyso maagay,
mise gaarigiiba intuu Qardho soo galay, saxiibadiisna
goor hore ka wada degteen bey isaga uunu u xanniban
yihiin.

"Waar Mahadow maxaad gaariga ka dhex qabanaysaa,
maad inaga soo degtid mise xalaybaad xusuus waayo -
waayo iyo gabdhihii Dugsiga dhex dabaalanaysay? "
buu Mahad ku soo baraarugey. alla yaa u sheega inuu
jirkiisa keliya baabuurka saaran yahay oo qalbigiisu
uusan weli Xamar kasoo amba-bixin.

Isla maalintuu Qardho tegayba intuu xafiiska
boostada haybsaday buu soo qoray warqaddii ugu hore-
ysay ee uu Muqdisho usoo diro. warqaddu Qoyskiisa
kumay socon, saaxiibadiisna kumay socon ee waxay ku
socotay mataantiisii Canab ahayd ee ay muddo gaaban
isagase la dheer is moogaayeen. culeys weynbaa
saarnaa markuuse warqaddii dhameeyay buu yara nafis
dareemay. warqado qoristu waxay la ahayd habka keli
ah oo uu dhibaatada isaga kalayareyn jiray.

Canab ma ayan lahayn sadduuq boosto oo warqadaha
loogu soo hagaajiyo, sidaa darteed wuxuu Mahad warqadda
kusoo hagaajiyay gabar la yiraahdo Shamso oo ay Canab
far iyo faraati isku ahaayeen....

Ma Canabbaa weligeed warqad meel qortay, ma weligeedbay boostada iyo meel warqad lagu diro ka ag dhowaatay,,,,,, inta warqad la qoray lana galeeyay, baa meel heblo loo diray uunbay maqashaye, ma tigidhadan kala ceynceynka ah ee warqadaha lagu dhejiyo bey arki jirtay.

Daahir oo ahaa Mahad saaxiibkiis iyo Shamso oo iyaduna Canab saaxiibaddeed ahayd baa u xil saarnaa habsami u socodsiinta waraaqaha ay Mahad iyo Canab isku dawinayaan.

Goor barqo xigeen ah iyadoo suuqa yaanyo ku iibinaysa bey Canab warqaddii soo gaartay, markay hubsatay inuu Mahad warqadda usoo qoray intay farxad la muransa dillaacday, howshiina waa kari weyday bey intay alaabteedii soo xirxiratay gurigeedii soo abaartay, inay sariirta xabadka saartay naasahana barkin ku tiirsatay iyadoo ay xusuladu sariirta ugu mudan yihiin bey warqaddii aqris ku bilowday.

Gacalo Canabey;

Waxaad iga gudcontaa anigoo kuu soo marinaya haraada u dhaxaysa Dardho iyo Muqdisho, salaan dheerran, deggan, dabacsan, fidsan, xushmeysan, qiimeysan, oo qaali ah, taasoo kasoo if baxday wadnaha iyo waaxyihiisa, qalbiga iyo qaararkiisa bogga iyo baalashiisa, maskaxda iyo maankeeda iyo halka aan nafteyda ugu jeclahay, salaantaasoo ay ku dhoehan tahay lix kun lix boqol lixdan iyo lixda aayadood iyo boqol iyo afar iyo tobanka ee suuradaha qur'anka ilaahay.

Caafimaadkeygu wad buu u heer sareeyaa, adigana kaas mid la mid ah baan eebbe kaaga rajeynayaa, nolosheydu wey sugan tahay, waxaan tebanayo oo aan adiga ahayn ma jiraan.

Canabey, furihii hablahaay fiiradii aragtideydaay farxaddii fankeygaay, faaliskii faraheygaay, faankii fikradeydaay, yaaney cidi ina ogaan, yaan la inaga faa'iideysan, yaan laisku keen dirin ee aniga i aamin adna is aamin, naftaadana aamin oo isku kalsoonow, anigana igu kalsoonow.

Inis niyadda iyo qalbiga, adkee waxaagga iyo barashada, ha fududeysan kalgacalka iyo jaylka san isu qabno, haka welwelin nasiibka iyo wqayaha hana ilaawin aayaha iyo mustaqbalka, ubuxu waa laga yaabaa inuu dhexmo xaddiidkuna waa laga yaabaa inuu daxaleysto, dad ehel ahi waa laga yaabaa inay is ilaawaan mucaashaqiintuse isma halmaamaan.

Aragtidaadaan u hiloobey, dharaartii maharsado habeenkiina ma ledo, cuntadii waa la igu-direy, wax cabisna haba sheegin, waxba ma maqlo, waxna ma arko, intaasna adiga uunbaan kugu soo maqanahay. haddaba waxdan kaa codsanayaa inaad hadalkaaga iisoo duubto si aan nafta uga sasabo, sawirkaagana iisoo dirto si aan indhaha ugu samirsiiyo, qalbigana sahay ugaga dhigo.

Gacalo waxaan isku ognahay fiiro gaar ah, xusuus gooni ah, kalgacal dheeraad ah, xiiso fidsan iyo kalsooni dhab ah , xusuustu waa qaali ee ogow,

...iyadduna waa rasmi ee la soco, kalsoonidu waa halkeedii ... ha hilmaamin, kalgacalku waa joogto ee u fiirso, ...aceylkuna waa sed ee ha fududeysan, waafajintuna waa ...i ilaah ee ha moogaan.

Gacaliyahaa Mahad oo Qardho ku nool.

Intii ay Canab warqadda aqrinaysay waxay la ahayd ...ay badweynf farxad ah dhex maquuranayso, ilmada ...dhaheeda ka soo daadaneysana intay dhabanadeeda soo ...lmaraan bey warqadda ku dul da'ayeen.

Kalgacal baa Canab ka ...eysiiyay .. oo maxay ...hayd badweynta farxadda ah oo ay ku dhex hafatay ....o dareenka jaceyl oo ...bti ...i ma badweyn farxad ... baa, mise badweyn murugo ah.. jaceylku ... damo ...afimaad oo cudurada lagu dabiibaa mise waa dacar ...ra... iyo sun iyo waabaayo.. ma bashbash iyo ...rwaaqiyo nafta raaxadeedaa mise waa cudur aan ...rinoo nafta hoog u horseeda... ma nimca da' ...ynoo daa'inku noogu deeqaa mise waa welwel iyo ...rxumo murugo la deris noqo... madhamac kululoo ...abarka kaa gubeysaa ... ma boog damqaso badanoo ...eligeed bogsoonbaa... madabeyl udgoon oo dadku ayan ... maarmin baa, mise waadareen aan jirinoo dadka ruuxii ... dan leeyahay dabin looga dhigo....

Warqaddii bey dhowr iyo toban jeer aqris ku ...obtay, lamaba aha in ay xitaa mar qura aqrisay , ...rkay warqaddiiba ilmadii faraha badneyd ee ku ...roortay awged la qoyday intay gambar ku dul wartay

bey iyadiina dalaq tiri hurdo ay hurdo tii ugu macaaneyd tan iyo markii ay soo hana qaaday.

Waxaa beerkeeda farxad la gujeynayay erayada naxariistu ku dheehan tahay ee uu Mahad warqadda ugu soo qoray, waxay warqaddaasu sii kordhisay heerka Digriiga uu joogay jaceylka ay Mahad u qabtay, ma farxad baamise... wadnaheedu farxad dheeraad ah darteed inuu howsha joojiyo buu ku sigtay.

Isla galabnimadiiba intay qalin iyo warqad daf soo tiri gambar yar oo ay miis ahaan u isticmaashana soo dhoweysatay bey bilowday qorista jawaab celintii dhambaalkii uu Mahad usoodiray.

Meel ay hadal... uga bilowdo iyo hab ay wax u qorto bey garan weyday... ma gacaliye mise aboowe macaan bey tiraahdaa.... ma warqad bey weligeed qortay mise dhambaal jaceyl ah bey diyaarisay.. af-Soomaaligii hodanka ahaa baa lasoo yaraadey .... waxay baadi goob-kooda ka quusatay weedho af-Soomaali ah oo ay dareenka jaceylkeeda ku cabbirto, oo mey Shamso ula tagto iyadaa dhambaalada jacelka qoristooda xirfad ku lahayde.... maya..maya.. ceeb waaye, af qalaad laba garaye oo haddana afkaagii Hooyo miyaa lagaaga turjumayaa... eraygii ay is tiraahdo alleylehe kanaa Mahad u qalma waa la xumaa-daa. intay kii iska tuurto buu haddana kii kalana la xumaadaa. waxay shaki iyo walaac gambarka la dul fadhidaba markay quusatay afar warqadoodna hore u jeexday bey warqaddii ugu dambeysay ku fara adeygtay:-

Gacaliye Mahad;

Iga guddoon salaan aan saadaasheeda ku sahmiyay saldhigga aad ku nooshahay, saxar cudur ah aan lahayn saxansaxo udgoon badan iyo sacab duco ahna sidata.

Gacaliye, iga hoo salaan bilan, mid aan ubax kusoo ladhay, sadriga iyolaabta, sanbabada jidhk eygiyo, saableyda feeraha lafta dheere dhabarkiyo dhuuxiyo laxaadkiyo, hiyiga iyo beerkiyo halbowlaha wadnaha soo dhex martay, Somali Airlines iyo siisow sabaaxaya, iyo dabeylaha sayaaxa saddexdaas midkii bilan baa kuu sida salaantee gacaliyow sideo tahay?.

Gacaliye, aad baan u caafimaad qabaa ddna mid taas ka tayo wanaagsa baan eebbe kaaga rajeynayaa, way isoo gaartay warqaddii aad iisoo dirtay, waxayna runtii iga qaadday culeys weyn oo awal oogadeyda ku hagoognaa, Waxaad iga soo codsatay inaan hadalkeyga cajalad kuugu soo duubo si aad nafta ugu samirsiiso, taasi aad bey ligu adag tahay waayo cajalad iyo Rikoor reerkayagu mabalaha, raadintooduna waqti dheer bey u baahan tahay waanse isku howli doonaa sidii aan naftaada isku qancin lahaa, sawirkii aad iga soo codsateyse diyaar weeye oo warqaddan buu kuula socdaa.

Gacaliye, halkaad ku nagidahay maxaad caawa haysaa, hawada caafimaadkaadiyo heerka noloshaada hayntaada seekiyo sidey howshu kugu tahay, hibashada xusuusta nuudo kaama seexdoo wadnahaa i habayee kaaguna ma heesaa, haasawaheenii ma isuo hilowdaa, habeenkii kolay tahay malay kaa hor keenaa, hareertaada gogosha

ma ku haabataa gacan, sida geel haleelaa hoos miyaad ka reentaa, hamuunta iyo xiisaha ma ishaysan weydaa oo sida hoobal caan baxay keligaa ma heestaa.

Hambalyada salantiyo ma heshaa waraaqaha, hudhud armuu ku lumiyaa oo heedhe la isku keen diraa, armaad halacsataayoo ku hawirantaa meel kale oo caashaqii horeeyiyo keenii halmaantaa?.

Haatufkiyo dabeylaha war la hubo usoo dhiib, hindisuhu siduu qabo hor allee waan ku sugayaa, anigo wacan iyo adoo wanaagsan rabbi haysku keen simo.

Gacaladaa Canaboo Muqdisho ku nool,

Markay Canab warqaddii ka faraxalatay, intay dhowr iyo toban jeer dib u aqrisay hal sawirna ku lifaaqday, gal cadna dhexda u dhigtay bey isla galab-nimadiiba farta ka saartay Daahir iyo ahaa Mahad saaxiibkiis, Mahadna uu kula dardaarmay inuu u galo kaalintii uu isagu ugu jiray, nasiib wanaag gaari isla subaxnimadii baxayay buu warqaddii Daahir ku daray.

Afar maalmood kaddib bey warqaddii Mahad gaartay waxayna afartaas maalmood Mahad kala dhigneyd laba sano oo uu ku noolaado dhul waaqle ah oo aan dad iyo duunyoba lagu ogeyn, saacad kastaba xafiiska boostada iyo goobaha ay baabuurtu yimaadaan kana baxaan buu ku gaafwareegayay, gaarigii yimaadana inuu warqad uga sido Canab buu hiyadda gashanayay... armaysan warq-addiiba gaarin... gabar lama aaminee armay tii Shamso

ahayd galka seefta kala baxday oo aad safar aan soo socon dhowristiisa ku caga gubyootaa... ma dhamaado waqtigaad soo dhoweysataaye dheeraa..dheeraa muddaduyey bey arrintiisii gaartay.

Markii warqaddii ay mataantiisu usoo dirtay farta laga saaray, intuu is haysan kari waayay buu farxad la ilmeeyay, faraxii ugu reynreynta badnaa oo muddo dhowr sanadood ah soo mara buu sida gaadhaa bidhaanta wejigiisu la hillaacayay. marbuu damcay inuu warqadda galka ka furo bartii loogu dhiibayna ku aqriyo, wuu is qabtay oo waxuu ku adkeystay inuu gurigiisa ka tago, waxaana suurta gal ah in ay warqaddu xambaarsan tahay dhimbil nabadgelyada naftaada halis gelin kara, intuu isku samirsiiyay buu gurigiisii qabtay asagoo aan dadka iyo baabuurka ka leexaneyn, sidii isagoo ah gaari dab demis ah oo xaafad fog loogu habar wacday.

Warqaddii Canab ka timaada ma mid lagu qaboobaa .. warqaddii aysan Canab soo dirin oo cid kale ka timaadase ma mid lagu qasaaraa....

Markuu muddo magaalada Qardho ka shaqaynayay, isaga iyo Canabna warqaduhu si tallaantaali ah ugu ala socdeen bey Mahad gabar ay meel ka wada shaqaynayeen jaceyl ugubbax ah laabta ugu qaaday, dhowr jeer bey si toos ah iyo si dadbanba ugu soo bandhigtay lad dhowr ahna wey usoo dirtay, wuuse gacmo seyray, illaa dad yaa u kala warama wax isma yeelleene.... iyo qof meeli u muuqato baa meel kale loo jeedin karaa.

goor kasta ama guriga ha ahaato ama goobta shaqadee inay hareerihiisa fadhido bey door mooday... wuu ka harsan waayay kana seexan waayay... oo ma qalbigu ma laba ruux buu wada qaadaa.

Ayaamihii ay howshu gebagebada ahayd bey misna jeceyl laab la kac ah isla soo mutuxday... oo muxuu u qabtaa.. alla yaa u sheega inuu uinkaasi ku howlan yahay siduu uga gudbi lahaa badweyn leh mowjado dhaaman dheer oo farxad iyo murugo isugu jira. oo ma Canab buu wacadkii kaga baxaa.. maya taasi waa dhaacal timo ka soo baxeen iyo dameer san madow oo siinn loo arki maayo ee muxuu u qabtaa.. qancin iyox wax u sheegis wuu kala noogay ee muxuu sameeyaa... aragta inuusan ninkani ahayn nin jaceyl diid ah, balse uu yahay nin ay meeli u caddahay, bal may niyaddeeda ka goosato... sidaas kagama ayan harina markii ay muddo daba taagneyd kana quusatay bey in ay aawadiis isu dili doonto ugu hanjabta dhegse jalaq uma siinino danihiisuu ka raacday.

QEYBTII SIDEEDAAD.

"Alla yaa wax ii dhiiba oo ilaahay wax u dhiibaa" buu Mahad intuu albaabka isku nabay cod aan kiisii lagu yaqaanay ahayn ku yiri.

"Allaha kuu sahlo, ilaahayna wax ha noo soo wada dhiibo" intay Hooyo Cambaro kor ugu dhawaaqday bey howsheedii iska sii wadatay, intuu Mahad qosol kasoo fakan lahaa dib u liqay, gowsahana isku ruugey buu mar kale tuugsigiisii hore kusoo rogaal celiyay, sidii oo kale bey misna Hooyo Cambaro ugu dhawaaqday.

Markuu Mahad dhowr jeer tuugsigiisii ku celceliyay iyadiina hadba dayro ka hor geynayso, inta miskiinka madax adeygiisa la yaabtay bey albaabka soo balleysay iyadoo ku qaylinaysa "Waar miskiinkan madaxa adagi muxuu ahaa miyuusan dayraba aqoon"

Intay albaabka qoorta ka dhiibatay, bey hareeraheeda dhugatay, misa miskiinba ma taagnee waa Mahadkiiyoo derbiga isku nabaya, intay qosol dheer ku dhufatay iskuna duubtay bey guriga dalaq soo yiraahdeen.

Si fiican baa Mahad loo soo dhoweeyay wuxuuna Xaajigu markuu quraacdayba, farta ka saaray furaha gaarigii CROLADA ahaa ee uu awalba wadan jiray, si uu saaxiibadiis isla maantaba usoo wada booqdo.

Lixdii bilood ee uu Mahad Qardho ku maqnaa waxay Xaajiga iyo walaalkiisba ku howlanaayeen tabaabushe dheerna ugu jireen isu guri geynta carruurtooda, marka uu Mahad Qardho ka yimaado inta uusan jaamicadda yelin in ay durbadiiba isaga iyo Mulki isu guuriyaan bey odayaashu talo ku gooyeen, Mulki qudheedu dab yar oo shideynine kaalin mug leh bey tabaabushana arooskeeda kaga jirtay.

Waxay odayaashu diyaariyeen guri weyn oo Villa ah, saabaankiisuna u dhan yahay, lacag dhowr boqol oo kun ah oo fantasyaha arooskooda loogu tala galayna gooni bey isugu xireen. Mulki iyaduna intay dhowr abdhood kaxaysatay bey sharaxaad iyo qurxin gurigii ula dhaqaaqday. waxa keli ah ee harsan ee la ddhowraayna Mahad imaatinkiisa uunbay ahayd.

Xiriir warqadeed oo joogto ah ayaa Mahad iyo Qoyska ka dhexeeyay, akhbaaraad farax leh bey diri jireen, isaguna hadba intii karaankiisa ah wixii uu Qardho kula kulmay iyo xaalladda noloshiisa buu uga soo warami jiray.

Marbuu Xaajigu damcay inuu ku wargeliyo tabaabushaha loogu jiro dhakhso isugu guurinta isaga iyo ina adeertiis, laakiin Hooyo Cambaro oo tuhun weyn Mahad xaggiisa ka qabtay baa isku daygaas ka hor istaagtay. " wuxuu Mahad damacsan yahay iyo webiga yaa weyn bey umuurtayadu joogtaa ee Xaaji bal gaabso" intay Cambaro lasoo booday bey Xaajiga ka dhaadhicisay sida ay u habboon tahay in Mahad oo warmooga mar qura gabar iyo guri diyaar ah hoorta laga geliyo.

Wuxuu ugu horeynba Mahad tebay guriga gacalisadiisii Canab, waxaana loo sheegay inay Suuqa ku maqan tahay, intuu gaariga si hufan hannaanka ugu qabtay buu afka saaray suuqii ay yaanyada ku iibin jirtay, wuxuuna ka dul dhacay Canabtiiyoo mashquulsan, dhidid fara badanina uu ka da'ayo, hablo aan yareynna oo ku xoonsanaa yaanyo u qeybinaysa.

Markay Canab aragtay Mahadkiiyoo intuu albaabka gaariga fag kasoo yiri dhankeeda usoo ololaya, intay is haysan kari weyday dadkiiyoo dhanna doo dhex jibaaxday bey sida halaqii isugu madhay.

Dadkii suuqyleyda ahaa ee suuqa ka shaqaynayay iyo kuwii kale ee wax gadashada uspo baxay baa mar

qudha soo wada jalleecay, qaar baa yaab iyo amankaag ku qallalay, qaar kalana hinaaso iyo calolyow buu madaxu la wareeray.

"Geedkii jaceylka ee aanu wada jirka u beermay armey gacalo shimbiruhu wax yeeleeyeen", buu Mahad hadal uga billaabay.

"Maya..Maya.. Gacaliye hadmeynu mirihiisa guranaynaa" bey si raxmad leh ugu warcelisay.

Intuu Mahad qosol gaaban dhag kasiiyay gacantana u fidiyay buu ku yiri "Canbey, howl baa ku sugeysa sidaa darteed Caawa ayaan guriga kuugu imaanayaa ee nabadgelyo".

Bil kaddib inuu Canab la aqalgalo buu Mahad qorshiisu ahaa, ma dooneyn inuuJaamicad ama shaqo kaleba galo, ee intuu iska guursado inuu maalka aabbihii maamule ka noqdo buu rabay, Mahad markii uu qadeynayay isagoo amuurtaas iyo sidu ka yeeli lahaa nafta la gorfeynaya baa aabbihii u yeeray.

Wuxuu odeygu Mahad shaaca uga qaaday barnaamijka taxan ee ay isaga iyo adeerkiis in dhawaalaba kasoo shaqeeynayeen, waxuna ugu dambeyn ku wargeliyay in habeen dambe isaga iyo ina adeertiis Mulki la isku marin doono, maalinta xigtana arooskooda la dhigi doono. Maalintaas habeenimadeedana la qaban doono xaflad ballaaran oo munaasabaddaas lagu weynaynayo "In Hotel Taleex xafladda arooskiina lagu qabto bey ina adeertaa door bidday" "Intaas buu aniga war igaga dhan yahay ee waa adiga iyo raganimadaada, waxaade ogaatee in aad marakan mas'uul tahay, lagaana doonayo

inaad ka baxdo shuqul ciyaaleedka aad ku kici jirtay"

Sidii tiiyoo waran caarad dheer isagoo sii rucleynaya dhabarka looga qabtay buu Mahad wadnihiisu gebi dhacleeyay... ma hadal baa meesha u yaalla, mar horaaba sidii la rabay arrin ku dhamaadaye... ma cid hadalkiisa daneynaysa waqtina u haysa baa jirta... Haddii hadalkiisu uu qiima gal yahay sow hadalkii uu hore u yiri looma tixgeliyeen, ... oo dulucdu ma Canab ka uur adkeysoo Mulki mataantaadi caashaqa ka yeel baa, oo Canab maxay bi'isay, mise gardarraa lagu gelayaa...ma saboonimadaa lagu nacayaa mise goldalloole kalaa lagu arkay... mukulaali qoor qabasho biyaha kuma qurqurisee jaceylku ma qasabbaa.. dareenka dhabta ah ee jaceylku ma mid adigu intaad intiintiisa soo ururso aad si fudu laabtaada ugu dhex beeri kartaa, mise waa mid goortey dookhaagu is afgaartaan si toos ah oo aan ka weecasho lahayn u dhex gala una dega xubnaha dirkaaga...

Jaceylku ma wuxuu ku yimaadaa dirqi iyo laab la kac aanay gundhig u ahayn xaqiiqooyinka dhabta ah ee qofka ku dhalin kara inuu qof kale jaceyl laabta ugu gunto... ma waxaa nafta lagusamirsiin karaa inay jaceyl u qaado qof aysan iyadu iskeed u calman baa... sow kaasi jaceyl lagu hungoobay maaha, jaceylku ma noole la taaban karaa, wax arki karaa, maqlina karaa, mise waa dareen quwadda dhaqaajisa xoog weynaanteeda awgeed awood u leh inuu si fudu ku dhex xulo xubnaha jirkaagam isagoo u dan leh inuu qol ka

dego afarta qol ee uu wadnuhu ka kooban yahay, halkaasna uu ka maamulo farxaddaada iyo murugadaada qof ahaaneed,..

Jaceylka dhabta ahi ma mid ay dhalin karayaan amase ay ceynaanka u hayaan baa waxyaabaha raqiiska ah ee ay ka mid yihiin:- Hantida, Caadooyinka qaarkood ee haraadiga ah, jinsiyadda iyo wixii kale ee la halmaala... alla maxay waayahan iyo dadkuba kala wareejinayaan mucaashaqiinta is doorta intuu niyadda iska yiri buu feker dheer gunta u degay.

Waxay isla duhurnimadiiba u dhalandhoolay gurigii saaxiibkiis Daahir , wuxuuna la socodsiiyay xaalka halka uu marayo iyo sida ay talo u sirgaxan tahay, sida badan Mahad aad buu ugu qanci jiray talooyinka uu daahir usoo jeediyo weyna isku caqli dhowaayeen, markanse qancin uu qanciyaba ha joogtee talo naxdin ku noqotay buu kula hor kufay.

Wuxuu kula taliyay inuusan marnaba barbareyn waalidkiis iyo gabar ay shalay isbarteen , berritana kala togi karaan, wuxuuna ugu dambeyn nadal ugu soo gaba-gabeeyay inuu taladaas mudnaanta koowaad siiyo, haddiiba uu doonayo baraare adduun iyo mid aakhiro.

talow dadkoo dhan maxaa igu diray intuu niyadda iska yiri buu Mahad gurigii Daahir kasoo baqoolay, isagoo dhaliilsan taladii uu Daahir kula soo taliyay. Mahad wuxuu Daahir u fahmay inuu yahay nacab qarsoon oo ku lid ah habsamiix u socoshada xiriirka isaga iyo Canab ka dhaxeeya.

Goor ay casir liiqii tahay ayuu misana baleeyay guriga mataantiisii Caashaqa ee Canab, isla galabtaas habeenkeedii bey Canab la ballansaneyd Mahad markeyse indhaha ka qaaday Mahadkiiyoo ballantii ka soo hormaray, murugana la luudaya bey mar qura xaaddu wada joogsatay "Gacaliye maxaa kugu dhacay"

Wuxuu Mahad daaha uga qaaday Canab, halka ay arrini cagacageynayso iyo weliba sida uu xaalka u murugsan yahay, wuxuuna shaaca uga qaaday qaraarkiisa ah inuu habaarka doorto, haddiiba duco iyo habaar la doorransiiyo, dhegna uu jalaq usiin tala kasta oo wadajirkooda carqaladeynaysa.

Ma haboonain habaar waalid faraqa loo goto waxaana la yiri:Iin habaarani ma harsado, habaar waalidna ninkuu taabtay baa og maahee, wax fudud oo la dhayalsan karo maaha, sidaad moodaysana maaha ee suurtagal ma tahay in aad waalidkaa si hufan wax uga dhaadhiciso"

"Maxaan wax ka dhaadhiciyaa talo faraheyga kuma jirtee"

Waxaa Canab mar qura horteeda la keenay rafaadki qabsaday Hooyadeed oo aabbaheed dayro ku guursatay maxaase ka raacay, ehelkoodiibaa xariga u jaray, sanku neefle sidee tahay ugu yimaada bey ka quusatay , far kaliya fool ma dhaqdee marka ay mushkilo la soo deristo bey ugu darreyd, rafaadka iyo saboonimada ay maanta ku jiraan deyrintii aabaheed bey Canab u aanaysaa.

oo adigu ma toobiyihii ay hooyadaa ku soo muruxday baad gadaal ugu noqotaa... markuu aabbahaa bukay iyo markuu dhintayba waad ogeyd rafaadkii dhacaye, makiiyoo kalaad u bareeri kartaa... yaa ilmahaaga waalid u noqonaya, dhibaatadii gaartana la garab geli doona, sow carruurtaadu rafaadkii aad kusoo kortay kusoo barbaari mayaan.. oo sow taasi kud ka guur oo qanje u guur maaha... haddii ay arrintu ceynkaas tahay inaad talada waalidkaa raacdo baan anigu kugula talin lahaa,intay iyadoo la baqaysa tiri bey oohin gorodda jilbaha la suratay.

Ihulka iyo cirkaa Mahad la wareegay, dhegihiisi warkey maqleen inay maskaxdiisa u tabiyaan bey ka dhaarteen... arraysan qoftan ku hor fadhidaa Canabtiiba ahayn intuu mar niyadda iska yiri buu daymo labaad tin iyo cirib dib ugu laabtay... ma Canabey erayadaasu afkeeda soo qaban karaan ... malaha jaceylkeeda ayaanba jaceyl ahayn... oo aaway jaceylkii ay la ilmaynaysay... oo iyadu deyrinteeda maxaa ka galay, oo waalidku hadduu kuu soo jeediyo talo aan hufneyn mustaqbalkaagana ku cadow ah ma inaad isaga raacdaa:

-Canabey miyuusan jaceylku dhab kaa ahayn, maxay tahay shuruudaha hor leh ee aad igu xirayso.

-Gacaliye waan ku jeclahay, laakiin...

-Oo laakiintuna maxay ahayd?

-Gacaliye ilmo ay waalid deyro ahi dhaleen xaggee bey ku noolaanayaan, yaase waalid iyo walaalba u noqonaya oo becrito garabkooda istaagaya.

-Waad laqwinaysaa, war ilmaha ilaah baa abuuray isagaana

irsaaqaya,dhibaato uusan isagu u qorinna gaariba mayso.

-Annagaa deyranimo kusoo barbaarnay, mana doonayo inay ilmahaygu dhibaatadii oo kale ku koraan. rafaadka deyrintii aabbahay iga raacdey waa tan illaa iyo hadda iga hari la', Hooyadey oo aabbahay deyranimo ku guursatay dhibaatadii aan marnay bey kusoomudatay.... aboowe ma doonayo in aan Hooyo u noqdo ilmo uu aabbahood deyro yahay illeen anigaa sidaa kusoo koraye, mana doonayo inaan dib ugu noqdo dhibaatadii Toobiyihii dhirirka badnaa ee aan hore ugu soo murxay,

-Canabey waa ku sidee sowdigan dhowrka daqiiqadood ku burburiyay jaceylkeennii muddada soo taxnaa, ma halmaantay wacadkeenii ahaa in aynaan kala harin wedku inuu na kala wado mooyee.

-Ma halmaamin mana halmaanto doono, caawadan la joogano diyaar baan kuu ahay, haddii ay waalidkeenu isugu keen duceynayaan.

Jacaylku Canab wuu hayay, balse mushkiladaha guursashada Mahad oo deyro ka dambeyn doona baa buurta Kaliminjaaro kala qiro weynaatay. hadal waalid ma diidi karo habaar adag buu dhalaan haydaarta ma yeeli karo, jaceylkuna wey hayaa, bey umuurtoodu gaartay. Markay Mahad dhibkiisa garowso maagtaba intay rafaadka dabalyaalla ku argagaxdo bey iska aamustaa, laba kala daran lagu kala dooransii sow xaalkoodu ma noqon.

Wuxuu Mahad habeenkas qorshihiisu ahaa intuu

isla caawaba soo mehersado, kulana aqal galo guri xaafadda Madiina ku yaalla oo mid saaxiibkiis ahi lahaa, inuu halkaa kula caweeyo. kuma uusan fekerin halka uu xaalku ku dambeyn doono ee hamuunta uu Canab u qabay uunbaa ka saayid calaysay. dhowr kun oo jeebkiisa ku jirtay iyo qaar kale oo deyn ahaan uga maqnaa buu inuu weligii ku noolaan karo u qaatay, wuxuu islahaa markuu odeygu maqlo Mahad baa gabar guursaday intuu qorshihiisii hore ka tanaasulo buu hiil iyo hooba kula soo tiigsan doonaa. Mahad ma caqli xumeyn mana ahayn ceeblow casi ah , balse jaceylka dhabta ah ee laabta ugu xirnaa baa gayeysiiyay inuu ku kaco falkasta oo ula muuqda inuu gacalisadiisa ku hanan karo.

Gabdho sasabis iyo wax u sheegis bey wax ku leeyihiin intuu nafta ku samirsiiyay buu dhowr iyo toban jeer isla habeenkaas isaga daba laabtay isagoo hadba ugu soo rogaal celinaya codsigii uu indhowaalaba la dul gowriiray. markuu xaqiiqsaday inaan warkiisa loo dhugmo lahayn dhulkana lagaba qaadeynin buu gurigiisa isku ceshaday.

Canabey, qof ay farxaddiisu adiga kugu xiran tahay baad welwel iyo murugo adduun u horseeday, waxaadna maanka ku haysaa inaanan kaa harin oo aan qiyaamaha kugu sugayo" buu hadal ugu soo koobay.

Adduunyooy xaalkaa ba'... Mahadkii mala odoroska daaraha dhaadheer ku dhisanayay waa tanoo maalta gawaan cidla ah buu kadaloobaa.. dhulkuu faraha kuxariiqayaa.. jahooyinkii baa isaga qaldamay

wallee adduunyaa ku niikisay... oo maxaa markan meesha u yaalla mar haddii ay gacmo seertay Canabtii ahayd rajadii uu ku faanayay... Barina ma jiro galbeedna ma jiroee meel dhaxuu gabalku ugu dhacay..... Rafiiqeygiiyey warmaad igu riddee, ha i riiqinee rarka iga dul qaad sow xaalkiisu ma noqon... oo muu diido ma isagaa diidi kara, oo hadduudiido ma qorshe kaloo uu arrintaas kala hor tago buu hayaa... Canabti uu isku halaynayayba, waa tanoo wey ka hortimide ... teeda kale haddiiba uu gaashaanka ku dhufto qorshaha ay waalidkiisu wataan sow markaas isugu mataahoobi mayaan, gurigii oo lagu cayriyo iyo isagoon Canab iyo Mulki midna gacanta ku hayn.... Mulki gacan ku dhigisteedu habeen qura xitaa kuma uusan fekereyn, reerkina deyraad ka tahay, Canabka waad isa seegteen sow raafaad adduun maaha, sow markaas laba waddo dhexdood libaax kugu hel arrinkiisu noqon maayo.

QEYBTII SAGAALAAD.

Xafladdii arooska ee Mahad iyo Mulki oo Baar Taleex lagu qabtay, kooxda Iftinna ay muusik diiran ka tumayaan, waxa lagu casumay dhowr heesoodna xaga qaaday fannaaniin waaweyn haba ugu horeeyee wiilka macaan ee Zulfa iyo Jeeri oo aan isaguna dab yar shideyn, habeenkaas qof Xamar kuma harin baa la is lahaa, ushii cirka loo tuuraba meel bannaan kuma soo dhacayn.

Haddii aad Hoodiyo-ayaan leedahay sidaan oo kale ha lagguu guursado bey gabar kasta habeenkaas hoosta

kaga duceysanaysay, qosol iyo farxad bey Mulki ka bixi weyday, Mahadse welwel iyo murugo buu kursigiisa kula dhakoolay, habeenkaas farxad badanaa marna murugo badanaa wuxuu iyada habeenkaasi la ahaa habeenkii taariikhda nolosheeda ugu farxadda badnaa, wuxuuse isaga u ahaa habeen madow oo wadnihiisa baasha bidix kaga qabnaan doona, isagoo ku astaysan habeenkii ay shuftadu afduubeen... wey Mahad hambalyo wiil iyo caano gabar iyo caano markii ay saaxiibadiis ugu bogaadiyaan buu wadnaha jeex soo ruqaa... farxad iyo reyn reyn baa la isla dhex maryyaa Mahadse allow yaa mar uun meesha kaa wada bey ka soo gtay,... alla maxay wiil iyo gabar indhowaalaba is raadinayay oo wa xafladdan isku arkeen

Muddo bil ah dhan bey dhambaalada loogu tahniyadeynayay si isdaba joog ah ugu soo qulquleyeen Wargeyska Xiddigta Oktoobar iyo barnaamijka imaqashii Imadaddiili ee Radiyo Muqdisho ka baxa, magacyadoodii bey dadka radiyaha dhagaysta wargeyskana akhrista dusha ka qabteen, alla kuwan jaceylkoodu qoto dheeraayaa bey qaarkood niyadda iska lahaayeen.

Mahad bishii malabku naxdin iyo maahsanaan bey ku dhaaftay, mucaashaqiin baa bishii malabka ku magacowday, isagase bishii dacarta bey u ahayd. Iafteedu Mulki xiisihii faraha badnaa ee ay u qabtay Mahad bishaas aad buu usbo yaraaday, waayo waxay iyadu is lahayd markaas is guursataan intaad si hufan u raalli geliso baad Canab iyo jaceylkeeda halmaansiin doontaa, markayse isku daygeedii ku hungowday, aragtayna inuu

yahay dhadhaab aan labasoo loodin karin, buu qalbigeedu billaabay inuu si tartiib ah uga sii samro.

Habeen iyo maalin sariirta uunbuu beerka ku hayaa markay damacdo inay la sheekaysato juuq u oran maayo, raashinkii buu ka go'ay, raashin kastoo ay is tiraahdo ku qanci markuu laba jeer cantuugo buu ka istaagayaa, markay dhulkau quurtay raashin dhaxaa oo lacag fara badan ugu fadhiyay bey caloosheeda ka duuduubatay.

Jirkiisii baa gurmay, illeyn shilisnimada iyo dhaldhaalallu was raashinkee, markasuu yeeshay muuqaal uusan weligii yeelan.

Gabadhan habeenkiina soo dhinac seexata maalintin hadba hareertiisa iyadoo ilqabad leh soo fariisanayaa sidii gabar uu qabo oo kale ulama dhaqmee sidii maxbuus ay meel ku wada xiran yihiin buu ula mcaamiloodaa. mar uu sariirta ku xooran yahay iyo mar uu sawirkeeda Canab ku ildoogsanayo buu waqtigiisiiba isugu soo nuuray. Sawirka Canab buu ku hurdaa kuna soo toosaa.

Markay Mulki aragto, isagu kamaba qarsadee, isagoo dheehanaya, in cabbaar ahna kusii maqan intay maseyr iyo caro is biirsaday la ilmayso bey in ay reerkiisi kusoo ashtakayso damacdaa. marbey maagtay inay sawirka Canab ka qariso waxaan feer iyo rabshad ahaynse kalama ayan kulmin. magaalada ma aado saaxiibadiisna markay arkaan Mahad inuusan Mahadkiisi hore ahayn bey faraha ka qaadeen. habeenkii inta badan

wuu soo jeedaa, markuu gam'ana waxaan gacalo Canab ahayn afkiisa laga maqli maayo.

Mulki markay muddo afar bilood iyo bar ah u dul qaadanaysay caadooyinkii foosha xumaana ee uu Mahad kula dhaqmayay intay carootay bey reerkiisi ku ashtakaysay. Waxaa ashtakadii ka war helay Jaamac ~~dhagax oo Mahad~~ abtigiis ahaa in door ahna dalka America waxbarasho ugu maqnaa,

Wuxuu Jaamac Dhagax si deg deg ah shir isugu yeeray labadii oday ee Mahad iyo Mulki kala dhalaym wuxuuna tafaasiil dheer ka bixiyay sida ayan u habbooney in qofka dookhiisa la caburiyo. wuxuu u sheegay haddii iyagu ay isku guursadeen qorshah uu waalidkoodu ka dambeeyo, inay dhallinyarada maanta jaceylka isku doortaan iyaga oo aan dhalasho iyo maaliyad midna tixgelinayan. "Guurka jaceylka iyo doorashada xorta ah ku dhisan waa ka cimri dheer yahay midka dirqiga iyo isku doo boodka ku dhisan, Mahad boho dheer buu qoorta kala soo jeedaa, ee waa in wuxuu rabo loo sameeyaa", buu hadal ugu soo xiray.

Waxay odayaashu dood dheer isku hor fadhiyaamba waxay talo maangal iyo tu maangad ah caasha isu geliyaanba waxay ugu dambeyn talo la dhaafi kari weyday in Mahad iyo Mulki lakala furo, maaddaama iyaguba raalli ku yihiin, Mahadna loo oggolaado in loo guuriyo gabar alla gabadhii uu door bido.

QAYBTII TOBNAAD.

Gacaliye ma kaa dhabbaa ....Gacaliye ma kaa-dhabbaa ...bay canab ku waalatay kadib markuu mahad oogta uga qaadaygo, aankii ay waalidkiis isku soo raaceen.

'' Gacalo war badan looma baahnee, waxay waalidkeygu igu kaa naoaanba, ogow maanta adigey ku sugayaane'' intuu kula kaftamay buu u raaciyey, ''jimoaha kan meherkeennii weeye, maalmaha xigana fanlasiyihii arooskeenna dheh''.

Muddo afar bilood iyo bar ku dhan bey Canab iyo Mahad is moogaayeen, inkastoo ay habeen kasta riyada ku wada kulmi jireen oo marna uu isagu u tagi jiray marna ay iyadu u iman jirtay, haddana kulan fool ka fool ah oo ay dharaar oad isku arkeen ma uusan jirin. Mahad isbedel weyn oo naxdin leh baa mudadaas ku habsaday, Canabse walow ay isaseegii iyada iyo Mahad la uur gubyooneysay haddana kacaan horumarineed oo farxad leh baa nolosheyda u curtay.

Oday adeer ugu aadanaa oo in muddo ahba khaliijka ku maqnaa baa markuu yimidba hooyadeed guursaday, wuxuuna u dhisay guri weyn oo ay iyada iyo caruurteedu ku dekeeyaan, wuxuuna u horseeday nolol cusub oo noloshii rafaadka badneyd ay ku halmaamaan. waxay Canab gashay nolol cusub, asxaab badan bey yeelatay, wiilal aan markii horay baa gorradda u soo taagay.

Habeenkii higeyba wuxuu Mahad abaaray saaxiibkiis Daahir oo la taliyihiisa koowaad ahaa, wuxuuna u sheegay halka uu xaalku marayo iyo go, aanka ay soo wada gaareen isaga iyo dumaashidiis.

Allow nimaan wax ogeyn ha cadaabin, wuxuu Mahad si qayaxan ugu sheegay inuusan raalli ka aheyn guursashada uu Canab guursanayo, asagoo arrintaas sabab uga dhigaya inuu goobo fara badan ku soo arkay iyadoo la tumaneysa rag badan oo shabeel naagoodnimo ku caan baxay.

'' Ma faqiir wax helay baad wanaag ka sageysaa'' INUU kaga nixiyey buu ugu ladhay '' saaxiib haddaad been moodo hoo qaado warqadan casuumaada ah, kana soo qeyb gal xafladda arooska ha ee ay warqaddu tilmaameyso anigaa wax ku tusi dooneo''

Wuxuu Daahir ayaamahakanba ku howlanaa qorshe uu Canab ku soo jiidanayo, wuxuuna guurka Mahad ku noqday dhimbil dhabanka ka cuskatay.

Haddaba si uu qorshihiisu ugu dhaqan galo wuxuu Daahir isla habeennimadiiba u tegay Axmed Dheere oo ay si fiican isugu dheeraayoen, wuxuu la socodsiiyay qorshaha uu maagan yahay, wuxuuna ka codsaday inuu xaflada ka soo qoyb galo isagoo gaarigiis cad ceynaanka u haya, wuxuu kaloo ka codsaday in inta xafladdu socoto oo dhan uusan Canab agteeda ka fogaan marka ay xafladdu dhamaatana uu ku casuumo inuu gaarigiisa gurigeeda ku geeyo.

Waxaa Canab warqadda casuumaada u keenay dumaasige dumaasigeed Daahir oo isagu ku war geliyey isaga iyo Mahad in ay qabanqaabada xaflada ku jiraan, sidaa darteedna ay iyada iyo Shamsaba xafladda uun isku arki doonaan.

Markii la gaaray habeenkii xaflada Axmed Dheere gaarigiisii cadaa buu goobta casuumaada soo har qotonsaday, wuxuuna nasiib wanaag fadhi ka helay safka ay Canab fadhiday kursi ka banaanaa. intuu durba dhankeeda qooraansaday buu tarraq weydiistay, waxayso u sheegtay in ayan sigaarka cabin .Axmed Dheere oo haasaawaha hablaha khabiir ku ahaa intuu fursadaa ka faa, ideystay buu sheekada halkeedii kaga sii miisay ilaa ay ka gaareen in ay sheekeystaan sidii labo ruux oo horay isu yiqiinay. Daahir xafladda keligii sooma uusan aadinee wuxuu soo maray saaxiibkii Mahad, waxayna isku soo beegeen goor ay xafladdii gebogebo tahay , waxay durbadiiba indhaha ku dhufteen Canab iyo Axmed Dheere oo haasaawe ay qosol iyo farxadi ku dheehan tahay isku maaweelinaaya. Intii ayan xafladdu dhamaan buu Axmed Dheere ka codsadey Canab inuu gaarigiisa ku qaado gurigeedana ku geeyomarkey xafladu dhamaato.

Markey xafladdu dhamaatay gaarigii Axmed-Dheere ee banaanka qotomay bey si farxad leh ku wada raaceen.

Markuu Mahad arkay Canabtii ay guurka ku wada ballansanaayeen oo Axmed-Dheere gaarigiisa kala jiidan kula xaragooneysa bey tin iyo cirib jiriirico hareysay.

Mar buu ku fekeray intuu ka daba cararo inuu mataantiisa caashaqa kala soo harohaddana dib buu isu waansaday, waayo waxay ula muuqatay in wararka Canab laga sheegayo ay wax un ka dhab yihiin.

Isagoo badwyn fekrado ah ku dhex rafanaya, tallaabo uu qaadana garan la, baa waxaa dhabarka ka dharbaaxay Daahir oo dhiniciisa bidix taagnaa wuxuuna ku yiri '' Haye kaabe warka cadee, maxaad ka fekereysaa sow dhaayahaaga wax kuma arag, mise rajo guu oo dambe baad ka leedahay, saaxiib jaceyl aan lagula qabin barbaarintiisaad ku daashaye waxaan anigu ku leeyahay Aashaa soco''

In kastoo Canab habeenkaas xafladda farxad aad u qaro weyni ka muuqatay, haddana farxadeedu ma dhameystirneyn, waayo wallow ay aheyd xafladii ugu horeysay ee ay keligeed aado iyadoo aan Mahad ku wargelin tan iyo markii ay isku soo noqdeen waxay la yaabaneyd sababta Mahad iyo Daahir ama Shamso ay xafladda ugu arki weyday .

Tolow muxuu Mahad ku dhihi doonaa bay niyada iska la-hayd. waxay habeenkiiyoo dhan hadba dhan sariirta isugu rogrogtaba, waxay ugu dambayn ku seexatay in beritaba marka uu waaga baryo ay Mahad qaladkaas u wargeliso.

Masayr wayn baa Mahad ku dhashay, waxaana go'aan u-san ka fiirsan ku gaaray inuu Canab iyo jacaylkeeda ka fanaasulo ...Ma anagay nabtaa inay sidii kubadoo kale noo go cayaarto ...Ma anigay ii Baba boglayn kartaa ... markaan la joogo afkay malab iiga dhigaysaa, kolkaan ka tagana dacar qaraar bay ii walaaqaysaa...

Jirjiroole dumarow Raga waxaad ku jebisaan adigaan ku jeelow halgaceyl aan jirin baad weligiin jiibsaan...oo Canab ma jirjiroolaa?...

Habeenkiiyoo dhan indho ku uma gayn waxaana markasta hortiisa ku soo sawirmayay Canabtiiyoo gaari ay ku dangiigta, Axmad dheerana ku baashooda bidix ka dhinac-oole ...habeenkii baa ku dheeraaday ... Saacadii dal-saarnayd miiska yar ee ku qabsan sariirtiisa buu hi-lid kale dhaqaaqay isagoo ku eedeynaya inay mudaahan-naad shaqo anyaamin ah ku kaday. Indho sariirta hor-iga booday buu albaabka dhankiisa aaday, intuusan gaa-rin bay qof albaabka dhawr jeer soo jugaysay, albaab-kii buu fur siiyay mise waa Canabtiiyoo sidii ay sari-rta uga soo toostay ah.

"Maxaad iga soo doontay"? buu cod kulul ku yiri "Maad midkii gaariga kuugu watay raadsatid".

Gacaliye, qalad baad iga fahantay, intay si degan u tiri albaabkana hore u soo dhaaftaybay sariirtiisa madaxa kaga fariisatay.

"OO weliba waad isdifaacaysaa miyaa??intuu ku yiri shaar iyo surwaalna isku boobay buu albaabka ka booday. Mahad wuxuu ahaa dadka markay caroodaan aan afkooda ku cad goosan ee ama dagaalama ama aamus dheer waagu ugu baryin.

"Gacaliye xageebaad u carareysaa" intay waydiisay buu ku soo tuurat "Adigaan kaa cararaayaa ee inanyahay amaan i sii".

Intay indhaheedii ilmo qoysay bay iyadoo kala daadsan carartay, mise goor horuubaa libdhay.

waxay ka qoomamaysay xafladii ay xalay kaligeed aaday ...waxay nacalad dusha kaga tuurtay daanirkii warq la casuumadda u keenayi iyo shamsadii ay ballanta lahaayeen kaga baxday....Oo ma dabinkan bay kula rabeen....Shamso iyo Daahir waxaasi kama suurtoobaane halkay sirtu ka qydhansantahay, intay isku samir siisay bay armaa laysku kiin diray uurka iska tiri. waxay Canab isla subaxnimadii aaday

ciirsina biday dumaashigeed Daahir, waxayna u sheegtay turxaanta cusub ee iyada iyo Mahad kala dhex gashay, Daahir oo awlba carqaladdan ka danbeeyay wuxuu Canab u sheegay in uusan arintaasi dhexgeli karin, Mahadna uu yahay nin aan talo iyo waano midna qaadan "Oo raga oo dhan adigu Ma Mahad oo keliya ayaad ka taqaan"?. intuu ku daandaansadat buu shukaansi googoos ah hoosta kaala galay.....Markii ay Canab fahantay inuu ninkani qirsho kale damacsanyahay bay isaga dhaqaaqday wayna ku gacansayrtay shukaansigiisii ilayn adiga iyo Mahad saaxiibtinimadiinu gegi maran bay haawinaysaa, xagee baad saaxiibkaa Mahad ku halmaantay"

War ilayn balaayo waa tanoo kale inay dhowr jeer ku soo rogaal celisay bay afka saartay xaggaa iyo gyriga saaxiibadeed Shamso Alla yaa u sheega in Shamso qudheedu u dhuuntaagayso Mahad.

Waxay saaxiibteed u sheegtay Canab halku uu xaalku maraayo iyo sida ay kaalinteeda u marantahay, waxayse Shamso si cad Canab ugu sheegtay in aysan arintaasi dhexgeli karin, iyadoo sababsanayso inaysan Mahad kalsooni fiican ka haysan, isla markaana uu mahad yahay sida la sheegay qof aan talo iyo waano midna lagu karin.

Markay shamso ka warheshay kala carooshada Mahad iyo Canab bay istiri allaylehe

Fursadan waaa tii aad Mahad ku soo xero gelin laheyd.

Wuxuu Mahad is lahaa malaha arrintii saaxiibteed bey kuula socotaa, waxayse ula timid shukaanse fool ka fool ah, iyadoo weydiisaneysa mar haddi ay saaxibbteed kala caroodeen inuu iyada booskeedii ku buuxiyo. '' Gacaliye in muddo ah baan kugu riyoonayey laakiin meel aan kuu soo maro baan la, aa''bay hadalkiiba ugu soo xirtay '' Naa anigu gabar iyo saaxiibteed uma kala gooshee afkaada edeb u yeel baan ku irri '' intuu si kulul ugu ganay buu inuu dhirbaaxo ku sigtay, wuu dhirbaaxi lahaa haddii ayan gurigiisa joogi laheyn.

Muddo shan cisho ku dhan bey Canab iyo Mahad kala aamuushaayeen, fahamtay Canab inuu Daahir qoshahan ka dambeeyey isaguna uu xasaradan iyada iyo mataankeeda mataankeeda ka dhex oogay, laakiin mataankeedu waa nin hal adage sidee bey wax uga dhaadhicisaa... ma gurigiisa bey ugu tagtaa...oo sow kii soo [illegible] maaha...ma saaxiibkiis bey u dan sheegtaa ..oo sow isaguna kii mushkiladaba dhigay maaha, oo haddaaso maxay yeoshaa.

Waxay [illegible] warqad ay ku qeexeyso sida arrinku u [illegible], iyo waliba cidda kala caroosha dooda ka mas, uulka ah, waxay warqadeeda ku xustay inuu Daahir warqada oasuumaada ah Shamso ugu soo dhiibay, kuna soo

yidhi adiga iyo Canab naga sii hor mara aniga iyi Mahadna gadaal baanu ka imane, waxay kaloo warqadeeda ku sheegtay in isla subaxnimadii ay kala caroodeed ay Daahir u tagtay si uu iyada iyo Mahad u kala dhex galo, Daahirse intuu ku gacmo seedhay uu waliba shukaanse goos goos ah kula soo galgashay.

Intey warqadii galeysay bey gabar yar oo walaashiis ah ugu dhiibtay, Mahad warqadii akhrisay garayna sida wax u dhaceen iyo weliba cidda carqaladan ka dambeysay, wuxuu xaqiiqsaday in Daahir iyo Shamso ay dhacdadan ka dambeeyeen, Daahirna uu Canab isu rabay, Shamsana ay isaga u soo hanqal taageysay.

Intuu Mahad gaarigiisii kala jiidnaa ku booday buu, hor qotonsaday gurigii mataantiisii Canab si fiican baa loo soo dhaweeyey waxayna dabadeed isla falanqeeyeen sida ay arrintu u dhacday iyo waliba sida fudud oo nacabku ugu [illegible] rabay, ugu dambeyn iney Daahir iyo Shamso xirriirka u gooyaan bey talo la dhaafi kari weyday.

Habeenkii ay isa soo mehersadeen bey ku hashiiyeen in ay isla maalinta xigtaba isla aqal galaan, waayo guriga iyo alaabtii ay ku aqal geli lahaayeen diyaar bey aheyd, hamuun kalgacal oo sareysana wey isu qabeen oo waqtiba iney iska lumiyaan ma ay rabin.

Habeenkii ay isa soo mehersadeed subaxnimadii bey Canab aadey magaalada si ay u soo iibsato alaabo yar yar oo ay u baahneyd,Mahadna baqaaradii aabihiis buu kala agaasimid kula kalahay isagoo la muraarad dillaacsan farxadda qarada weyn ee caawa ku fool leh iyo weliba gogosha xalaasha ah ee uu caawa mataantiisa caashaqa kula jiifsan doono,buu telefoonkii hortiisa yaalay qeylo dhawaaqay.waxaa telefoonka looga soo diray isbitaalka digfeer waxaana loogu sheegay inuu Canab saakeyto gaari ku joogsaday,naftuna ay ku sii daba yar tahay.

Intuu naxay buu af labadii qeylo dhawaaqay. hareerihiisuu dhugtay mise wuxuu la joogaa gurigii Shamoo oo uu maanta sooryo qado ah kaga qeyb galay.wuxuu dhex fadhiyey asxaabtiisii oo gabdho iyo wiilal isugu jiray,qosol iyo haasaawe dhallinyaronimo beyna isku maaweelinaayeen...wuu gartay inuu maskaxdiisa isaga keliya uu ka dhex daawanayey qisadii yaabka laheyd ee dhex martay isaga iyo Canabtii labada bilood ka hor inta karfan oad wehel looga dhigay qabuuraha lagu soo macsalaameeyey.

Qeyladii Mahad ka yeertay bey dhilinyaradii naxdin darteed Mahad dhankiisan u soo boodeen.

Wey garteen inuu Mahad ka damqaday nabarkii in dhawaalada ku soo kici jiray.

''Mahadow,waxaan anagu ku leenahay iska illow Canab iyo jaceylkeeda,illeyn qof dhintay qabri kaaga soo bixi maayee,ogowna in ay gabdhuhu badan yihiin oo laga yaabo inaad hesho mid Canab oo kalqo ah amaba ka sii wacan,bey dhallinyaradii Mahad kula taliyeen wuxuuse ugu war celiyay '' Ilama ahan iney gabadha kale dunida ku nool yihiin'' inta aan dunida joogana gabar kale jaloodi maayo;; inkastoo oo aan Canab dunida isku seognay haddana aakhiraanu ku ballanaan nahay, balantaasi...balantaasi...balantaasi...

DHAMAAD DHAMAAD DHAMAAD.

Waxaa qisadan qoray ABDUQAADIR MAXAMED WACEYS
(CALI BAASHE).

M A H A D N A Q .

Waxaan mahad u celinayaa saaxiibkey C/shakuur Mire Aadan oo soo bandhigista qisadani igu taakuleeyay.

Waxaan kaloo mahad taa la mid ah u celinayaa walaashey Faadumo Jeesto oo igu dhalisay qisadan qoristeeda, ka, aantoodna ayan dhameys noqoteen.

Ma halmaamin Mahad Sheekh Aadan oo buugan garaacay iyo Aweys Sheekh Maxamed (Kalaay iyo Cabduqaadir Cabdi Nuur (Falastiin) oo iyaguna qoraha labaad oo buugan garaacay.

ILLIN JACAYL.

Dhis niyadda iyo qalbiga, adkee wanaagga iyo barashada. Ha fududeysan kalgacalka iyo jacaylka, haka baqin nasiibka iyo waayaha, hana illaawin aayaha iyo mustaqbalka. Ubuxu waa laga yaabaa inuu dharo, xadiidkuna waa laga yaabaa inuu daxalaysto, dad ehel ahi waa laga yaabaa in ay is illaawaan, mu caashaqiin tuse...

Aragtidaadaan u hilcebay, dharaartii ma harsado, habeenkii ma ledo, contadii waa la igu diray, wax cabisna haba sheegin. Wax ma maqlo, waxna ma arko, intaasna adiga uun baan kugu soo maganahay. Hadalkaaga ii soo duub si aan nafta ugu sasabo, sawirkaaga ii soo dir si aan indhaha ugu samirsiiyo, qalbiga sahay ugaga dhigo.

Waxaan isku ognahay fiiro gaar ah, xusuus gooni ah, kalgacal dheeraad ah, xiiso fidsan iyo kalsooni dhab ah. Xusuustu waa qaali ee ogow, niyaddu waa rasmi ee la soco, kalgacalku waa joogto ee u fiirso, jacaylku waa sad ee ha fududeysan, waafajintuna waa ta Ilaah ee ha moogaan.